2024–2025

# Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha

## BUUG-GACMEEDKA ARDAYGA IYO QOYSKA



ARDAY KASTA: COD. RIYO. MUSTAQBAL **WANAAGSAN.**

FEDERAL WAY PUBLIC SCHOOLS | FWPS.ORG

## HAWSHEENA

Jawiga filashooyinka sare, taageero sare, iyo maraan marsiiyo la'aan, shaqaalaha Federal Way Public Schools waxay si joogto ah wax u baran doonaan, u hoggaamin doonaan, uga faa'iidaysan doonaan xogta, una wada shaqayn doonaan si loo hubiyo in ardaydeennu yeeshaan cod, riyo, iyo mustaqbal WANAAGSAN.

## MUHIIMADA AAN AAMINSANAHAY

Waxaan aaminsan nahay in arday KASTA uu ku baran karo heerka ugu sareeya.

Waxaan aaminsan nahay in jinsiyada, dhaqaalaha bulshada, luuqada, asalka dhaqanka, iyo qaar kale waa in aanay noqon qiyaaseyaasha ee horumarka ardayga.

Waxaan aaminsan nahay in ay ardaydeena lahadaan cod, waa in ay isu arkaan inta ay wax baranayaan, waana in ay is ku xirnaadaan dadka waaweyn oo ayaga wax barayaan.

Waxaan aaminsanahay waa in waxa aanu maalin kasta fasalka ku samaynayno ay ku yeelanayso saameynta ugu weyn ee waxbarashada ardayga.

Waxaan aaminsanahay waa in aanusi joogto ah wax u barano oo aan ku korno dhaqankeena haddii aan doonayno in aan la kulano baahida ardayda oo dhan.

Waxaan aaminsanahay inay qasab tahay inaan si niyad ah u wadashaqayno oo xogta u isticmaalno hagitaan si aan u wanaajino dhaqankeena.

Waxaan aaminsanahay in qoysaskeena ay yihiin la-hawlgalayaasha muhiimka ah ee waxbarasho ilmo kasta.

**FEDERAL WAY**
PUBLIC SCHOOLS



# Ku soo dhawoow
## sanad dugsiyeedka 2024–25!

Dugsiyada Dadweynaha ee loo yaqaan 'Federal Way', waxaan aaminsanahay in arday kasta la xoojin doono lana diyaarin doono si loo horumariyo mas'uuliyadda shakhsi ahaaneed si ay u noqdaan xubno wax ku ool ah, wax soo saar leh oo ka tirsan bulshadayada. Degmadeena iyo midkastoo iskuuladeena ah, waxaan leenahay diirad xoogan si aan u xaqiijino natiijooyinka wanaagsan ee laxiriira qorshaha istiraatiijiga ah Hadafka 2: Ilmaha Oo Dhan: Shakhsiyaad Bobcaya, Kalsooni Leh, Masuulliyad Leh.

Buugyaheena Xuquuqda iyo Waajibaadka ayaa ah ilo muhiim ah oo tilmaamaya macluumaad muhiim ah oo la xiriira anshaxa ardayga iyo waxyaabaha laga filayo dugsiga. Dugsiyadu keligood ma samayn karaan waxaanan aaminsanahay in qoysaskeennu yihiin lamaanayaal muhiim u ah waxbarashada ilmahooda iyo guusha dugsiga. Maaddaama waalidku yihiin macallinka ugu horreeya ee ilmahooda, waxaan kugu dhiirrigelinayaa inaad dib ula eegto buug-gacmeedka cunugaaga si aad ugu baratid xuquuqda iyo waajibaadka abuuraya jawi waxbarasho oo aamin ah, togan, waxsoosaar leh.

Waxaa naga go'an inaan dhisno xiriir aamin ah qoysaskeena iyo ardaydeena ku saleysan ixtiraamka labada dhinac iyo masuuliyada la wadaago si loo kobciyo jawiga nabdoon, kobcinta iyo jawiga dhaqan ahaan ka jawaab celinta dhamaan ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska. Wadajir ayaan ku taageeri karnaa arday kasta oo leh cod, riyo, iyo mustaqbal ifaya.

Dr. Dani Pfeiffer
*Kormeeraha Guud*
*Dugsiyada Dadweynaha*
*Federal Way*

**QORSHAHA ISTIRAATIIJIGA**

2 *Ilmaha Oo Dhan:*
**SHAKHSIYAAD KOBCAYA, KALSOONI LEH, MASUULLIYAD LEH**

Arday kasta waa la xoojin doonaa oo loo diyaarin doonaa si ay u horumariyaan masuuliyadda shakhsi ahaaneed si ay u noqon kuwa fiican, xubnaha wax soo saar leh ee bulshada.

# BARASHADA ARDAYGA

✸ *Tallaabooyinka mudnaanta sare leh—*
*xoojinta mudnaanta inta lagu kudo jiro marxaladda fulinta*

**hadafyada** ······ **cabbirada hor-u-socodka** ······ **qaab sinaan ah**

## 1 *SANADAHA HORE:* DHISIDA AS AASKA

Arday kasta oo caalim ah waxaa uu geli doonaa dugsiga barbaarinta caruurta isagoo diyaar u ah inu barto xirfadaha dareenka-bulsho iyo taas oo horay u kaxeen doona arday kasta si ay ula kulmaan ama ka badiyaan heerarka darajooyinka fasalka ee Cilmiga Luuqada Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta dhammaadka fasalka 3aad. *Xiliga 2024 boqolkiiba 80% oo ardayda fasalka 3aad way buuxinayaan ama dhaafayaan heerka fasalka ee ELA.*

- Boqolkiiba ardayda isku soo diiwaangelisay barnaamijyada dugsiga barbaarinta oo tayada sare leh
- Boqolkiiba ardayda fulineesa heerarka PreK ee gobolka ee aqris-qoraalka iyo xisaabta
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda diyaarka u ah xannaanada, sida lagu cabbiray qiimeynta WAKIDS**
- Boqolkiiba ardayda fulinayaan heerarka Waxbarashada Dareenka Bulshada (SEL) ee sannadaha hore waxbarashada
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda kulma ama dhaafaya heerarka fasalka ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabaatka dhammaadka fasalka 3aad**

Arday kastaa oo keensadaa xirfadaha waxbarasho iyo dareenka-bulshada in uu noqdo mid guulaysto fasalka 3aad iyo wixii ka danbeeyo.

## 2 *ILMAHA OO DHAN:* SHAKHSIYAAD KOBCAYA, KALSOONI LEH, MASUULLIYAD LEH

Every student scholar will be empowered and Arday kasta waa la xoojin doonaa oo loo diyaarin doonaa si ay u horumariyaan masuuliyadda shakhsi ahaaneed si ay u noqon kuwa fiican, xubnaha wax soo saar leh ee bulshada. *Xiliga 2024 ma jirayaan cadeyn aan kala qeybsaneyn ee xogta edbinta. Xiliga 2024, boqolkiiba 100% ee aqoonyahanada waxay dareemeen in dugsigooda uu badbaado yahay oo u soo dhaweynayo sida lagu cabiray aragtida sahanka.*

- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda ka qaybgalaya ugu yaraan 90% waqtiga waxbarashada fasalka**
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda iyo qoysaska ka qaybgalaya shirarka ardaydu-hoggaamiyaan**
- Boqolkiiba ardayda ku heleyaan rajooyinka dabeecadaha aan-tacliinta ahayn oo ku salaysan heerarka karka warbixinta
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda kuwaas oo dareensan in dugsigoodu ammaan yahay oo soo dhoweynayo sida lagu cabiray sahanka aragtida**
- Boqolkiiba ardayda dhamaysta 24 saacadood shaqada adeega bulshada ka hor inta aan qalin jabin

Arday kasta wuxuu ogyahay, fahamsan yahay, oo ogolaanayaa dhaqankiisa / dhaqankeeda u gaar ah iyo dhaqamada kale iyo baahida waxbarashada, si ay u taageeran naftooda iyo dadka kaleba.

## 3 *ARDAYDA FIRFIRCOON:* KU HAWLAN, FIKIREYAASHA HALISTA AH OO LA XOOJIYAY

Arday kasta caalim ah waa lala xoojin doonaa lahaanshaha waxbarashadooda waxaana si buuxda logu hawlan doonaa si ay noqdaaan mufakiriintii xaaladaha halista ah iyo hal abuureyaasha. *Xiliga 2024, boqolkiiba 100% ee aqoonyahanada way ka qeybgalaan oo la tartamaan sida lagu cabiray aragtida sahanka.*

- Boqolkiiba ardayda ku hawlan ugu yaraan hal hawl ka baxsan minhajka
- Boqolkiiba ardayda oo si guul ah u diyaariya oo soo bandhigta mashaariicda dhamaadkii sano guurka
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda ku hawlan oo loolan ku jira sida lagu cabbiray sahanka aragtida**
- ✸ **Tirada shaqaalaha aadka u yaqaana ama ku kala duwan hawlgelinta dhaqamada ardayga, sida lagu cabbiray Xarunta Hoggaanka Waxbarashada 5 qiyaas ee baridda iyo Barashada™ (CEL's 5D) iyo Qaab dhismeedka hoggaanka ee Ururka Maamulayaasha Dugsiyada Washington (AWSP)**

Ardayd kasta waxa si firforcoon leh halwlan yahay xaaladaha halista ah iyo fekerka hal abuur leh, hadaf dejinta iyo muujinta kartida aqoonta dhaqan.

## 4 *AAGGA-KA KOOBAN KARTI DA:* AQOON SARE OO MAADOOYINKA DHAMMAAN

Arday kasta oo wax baranaya wuxuu heli doonaa fursad guul oo siman, wuxuuna la kulmi doono ama ka badin doonaa heerarka natiijada ee maaddooyinka oo dhan dhammaadka fasal kasta. *Marka la gaaro 2024, 80% ardayda fasalka 8aad waxay la kulmi doonaan ama dhaafi doonaan heerarka fasalka ee ELA.*

- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda la kulmay heerarka fasalka ee maaddooyinka muhiimka ah, sida lagu cabbiray qiimeynta gobolka**
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda ee muujinaya aqoonta nidaamka darajeeynta ku saleysan heerarka (ee maado kasta)**
- Boqolkiiba ardayda u diiwaangashan oo dhamaynayaan Algebra ee fasalka 8aad oo qaba celcelis ahaan darajada 3.0
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda ka qaybgalaya shaqada koorsada sare iyo kasbanayaan darajo lagu gudbo**
- Boqolkiiba ardayda noqodaan kuwa xoogahoo waxbartaan
- Boqolkiiba ardayda la kulmaan heerka ee qiimaynta tirada tixraaca

Arday kasta oo uu yeesho kalsooni dhaqanka sida arday ahaan oo si taxadar leh u isticmaala aqoontiisa/ aqoonteeda iyo xirfadaha u khibrada cusub oo kala duwan.

## 5 *KU DHEGNAASHADA IN UU QALIN JABIYO:* QALIN JABINTA DUGSIGA SARE ILAA GUDBIN GUUL AH

Arday kasta wuxuu si guul leh u dhex mari doonaa kala guurka muhiimka ah ee waxbarashadooda, wuxuuna ka qalin jabin doonaa dugsiga sare oo wuxuu diyaar u noqon doonaa kulliyadda, xirfadda, iyo waayo aragnimada dugsiga sare kadib. *Marka la gaaro 2024, 95% fasalka sare waxay ku qalin jabin doonaan waqtigii loogu talagalay.*

- Waqtiga kala guurka laga bilaabo Dugsiga barbaarinta kahor ilaa dugsiga hoose, dugsiga dhexe, dugsiga sare, iyo waayo aragnimada dugsiga sare kadib
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda fasalka 9aad oo qarka u saaran qalin jabinta oo waqtigeeda kudhacda**
- Kordhinta dhibcaha ardayda imtixaanada laga galo kuleejka (ACT, PSAT, SAT) iyo ASVAB
- Boqolkiiba ardayda qaba waayo-aragnimada STEAM (Sayniska, Teknolojiyada, Injineeriyada, Tacliinta iyo Xisaabta)
- ✸ **Boqolkiiba tirada dadka waawayn ee leh haysta shahaado Qorshe Xirfadeed oo tilmaamaya ugu yaraan mid ka mid ah kuwan: aqbalaadda kulliyadda, milatariga, tababarka ganacsiga/farsamada, shahaadada warshadaha/xirfad shaqo**
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda dhammaystiray codsiyada deeqaha waxbarasho ee laga helo kulliyada, FAFSA iyo WASFA**
- ✸ **Kordhinta qalin jabinta dugsiga sare iyo hoos u dhaca qiimaha katagidda dugsiga**
- Boqolkiiba ardayda qalin-jabineesa oo sii wata laba sano ama ka badan oo kuleejka oo hela shahaadada kuleejka ama dugsiga sare kadib
- ✸ **Boqolkiiba tirada ardayda ka diiwaangashan shaqada koorsada adag sida lagu cabibiray Tusaha Tacliinta Adag**

Arday kasta – oo bilaabaya xilli hore iyo taageero firfircoon – wuxuu abuuraa/isticmaalaa qorshe kala guur oo dabacsan, shaqsi ahaan ah aalad lagu hormarinayo waxqabadka tacliimeed, horumar joogto ah xagga qalin jabinta, iyo xirfada wacyigelinta iyo sahaminta.

> **Dugsiyada Dadweynaha Federal Way, mid kamid ah Aaminaadeeda Aasaasiga ah waa in qoysaskeena ay ka yihiin la-hawlgalayaal muhiim ah waxbarashada cunug kasta.**
>
> Kormeeraha Guud Dr. Dani Pfeiffer



## UJEEDADA

Ujeedaada buug-gacmeedka waa in la xaqiijiyo in dhamaan ardayda, qoysaska, iyo xubnayaasha shaqaalaha ay helaan macluumaadka xuquuqaha dugsiga iyo ardeyga ee muhiimka ah. Doodaha tusmooyinka ee ku jira buug-gacmeedkan waxay bixin doonaan waqtiyo wax la bari karo oo sahlaya fursadaha ardeydeyna ay wax uga baranayaan ficiladooda. Si loo ilaaliyo deegaano waxbarsho oo badbaado iyo wanaag leh, waxaan kobcin doonaa, dhiirigelin doonaa, oo aan awood siin doonaa arday kasta si uu u helo tacliin heer sare ah.

**Siyaasada iyo Habraaca:** Waxaa loola jeedaa tilmaamaha ay ansixiyeen guddiga Dugsiyada Dadweynaha Federal Way ee loogu talagalay go'aanada degmada iyo dugsiga ku saleysan. Siyaasada iyo hab-raacyada ugu danbeeyay ee la soo xigtay guud ahaan buug-gacmeedkan marka laga eego onleen waxaa qaab elektaroonig ah loogu xiriiriyay si loo eego.

**https://www.fwps.org/about-us/administrative-policies-procedures**

**RCW:** Revised Code of Washington (RCW) (Sharciyada Joogtada ah ee Lisku Soo Aruuriyay ee Washington) waa isku soo uruurinta dhamaan sharciyada gobalka Washington ee joogtada ah ee hadda shaqeeya.

**http://apps.leg.wa.gov/rcw**

**WAC:** Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka ee Washington) waa xeerar maamul, ama sharciyo, ay adeegsadaan hay'adaha, oo uu kamid yahay Xafiiska Kormeeraha Guud ee Isdhexgalka Bulshada, si loo dejiyo sharciyo iyo RCW-yada.

**http://apps.leg.wa.gov/wac/**

**2024–2025**

# Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha

## BUUG-GACMEEDKA ARDAYGA IYO QOYSKA

FEDERAL WAY PUBLIC SCHOOLS

# tusmooyinka


**Qiritaanka Helidda** ..... 3
**Hawlaha iyo Ciyaaraha Fudud** ..... 5
**Arimaha Soo Xaadirida** ..... 6
**Macluumaadka Akhlaaqda** ..... 8
WAXBARASHADA DAREENKA BULSHADA ..... 8
XUQUUQDA ARDAYDA EE ANSHAXA ..... 9
ANSHAXA ARDAYGA ..... 9
DABEECDA SAHLAN IYO MIDA WAYN ..... 10
HAKINTA IYO ERYIDDA ..... 10
DABEECADAHA HORSEEDI KARA FICILIDA EDBINTA IYO/AMA AKHLAAQDA ..... 13
**Diiwaanada Waxbarashada** ..... 15
XUQUUQAHA WAXBARASHO EE QAYSKA IYO XEERKA QARSOODIGA (FERPA) ..... 16
**Kheyraadka Elektaroonigga ah** ..... 16
QALABYADA CASRIGA AH ..... 17
**Dhibaataynta, Cabsi gelinta ama Xoog U Sheegasho (HIB)** ..... 18
**Maandooriyaha Waxyeellada leh** ..... 19
**Macluumaadka Caafimaadka** ..... 20
CUDURKA COVID-19 ..... 20
DAAWO KU QAADASHADA DUGSIGA ..... 20
**Wargelinta Qoysaska** ..... 22
**Siyaasada Takoor La'aanta** ..... 23
**Scholar-Led Conferences (Shirka Uu Hogaamiyo Ardayda)** ..... 24
**Xuquuqaha Ardayga** ..... 25
ANSHAXA LABISKA ..... 25
**Macluumaadka Xiriirka Dugsiga** ..... 26
**Gaadiid Qaadashada** ..... 27
XIRIIRKA BASKA ..... 27
ARDAYGA XAALADA GURI LA'AANTA HEYSATA ..... 27
**Gaariyada yaala Dhismaha Dugsiga** ..... 28
**Lifaaqa** ..... 29


Degmada waxay aqoonsan tahay sameynta COVID-19 uu ku yeeshay ardayda iyo qoysaska waxayna si dhaw ula shaqeyn doontaa Fayadhowrka Caafimaadka si loo fuliyo tallooyinka caafimaadka iyo badbaadada loo baahan yahay dhamaan. Waqi xaadirkan, tallooyinka caafimaadka iyo badbaadada waxaa kamid ah, kala fogaanshaha bulshada, xirashada gafuur-xirka inaadan caafimaad ahaan u awoodin ma ahane, gacma dhaqa joogtada ah iyo/ama jeermis dillida, baaritaanka caafimaadka joogtada ah, iyo joogista guriga marka aad xanuunsan tahay. Intaas waxaa dheer, tallooyinka iyo filashooyinka waa la soo daawici doonaa waxaana la gaarsiin doonaa ardayda iyo qoysaska sida habboon inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka. Ardayda waxaa laga rajeeynayaa inay u hoggaansamaan dhamaan tallooyinka caafimaadka iyo badbaadada.

## QIRITAANKA HELIDDA

Ujeedaada buug-gacmeedka waa in la xaqiijiyo in dhamaan ardayda, qoysaska, iyo xubnayaasha shaqaalaha ay helaan macluumaadka xuquuqaha dugsiga iyo ardeyga ee muhiimka ah. Doodaha tusmooyinka ee ku jira buug-gacmeedka waxay bixin doonaan waqtiyo wax la bari karo oo sahlaya fursadaha ardeydeyna ay wax uga baranayaan ficiladooda. Si loo ilaaliyo deegaano waxbarsho oo badbaado iyo wanaag leh, waxaan kobcin doonaa, dhiirigelin doonaa, oo aan awood siin doonaa cunug kasta si uu u helo tacliin heer sare ah.

Si loo xaqiijiyo xushmad loogana hortago waxyeelo, Dugsiyada Dadweynaha Federal Way uma dulqaan doonaan dhibaataynta, cabsi gelinta ama xoog u sheegasho inta lagu jiro saacadaha dugsiga, ama gaadiidka FWPS ee lagu tagayo lagagana soo laabanayo dugsiga ama munaasabadaha dugsiga uu qabtay. Tani waxaa kamid ah ficillada ulakaca ah ee elektaroonig, qoraal ama hadal ahaanta ah ee jir ahaan u waxyeeleeya arday ama dhaawaca alaabta ardayga; leh sameynta in si xoogan u faragashato waxbarashada ardayga; aadka u daran, joogata ah ama baaha ilaa ay ka abuuraan deegaan waxbarasho oo cabsi ggelin iyo hanjabaad leh; ama leh sameynta si xooogan in loo carqaladeeyo shaqada nidaamsan ee dugsiga. (RCW 28A.300.285 iyo Siyaasada Maamulka ee Deeganka 3207)

☐ Waxaan dib ula eegay Buug-Gacmeedka Ardayga iyo Qoyska ee Xuquuqaha iyo Mas’uuliyadaha gabi ahaantiisa cunigeyga. **Waxaan sii fahamsanahay in cunugeeyga haduu ku xadgudbo tallooyinkan ay sababi karto waayitaanka mudnaanta helitaanka, helitaanka laptop-ka ama qalabyada dusiga uu bixiyo, akhlaaqda joogtada ah, iyo/ama tillaabo sharci.**

☐ Waxaan dib u eegay qaybta Dhibaataynta, Cabsi gelinta ama Xoog U Sheegashada ee buug-gacmeedka waxaana oggalahay inaan taageero ku lug lahaanshaha cunugeyga, ee isdhexgalka wanaagsaan badbaadada leh ee ardayda kale. Waxaan oggalahay inaan kala xiriiro shaqaalaha dugsiga wixii macluumaad dheerad ah ee ku saabsan toosinta waxbarashada tacliinta cunugeyga ee deegan ka madax bannaan dhibaataynta, cabsi gelinta ama xoog u sheegashada.

☐ Waxaan oggalahay cunugeyga inuu si habboon u isticmaalo khayraadka elektaroonigga ah degmada ee loo qaabeeyay ujeedooyinka waxbarasho, oo ay kamid yihiin adeegsiga intarnetka iyo iimaylka.

☐ Markaan oggalaado Buug-Gacmeedka Ardayga iyo Qoyska ee Xuquuqaha iyo Mas’uuliyadaha, waxaan u oggalaanayaa degmada inay ku daawacdo shaqada dugsiga ee cunigeyga khayraadka iyo isgaarsiinta degmada.

☐ Waxaan dib u eegay oo aan fahmay sharciyada gobalka iyo siyaasadaha degmada ee la bixiyay ee ku saabsan shuruudaha soo xaadirida. Waxaan qirayaa doorka iyo mas’uuliyada aniga iyo cunugeyga naga saaran xaqiijinta inuu dugsiga u xaadiro si joogta ah.

☐ Ardaygayga ayaa raaci doona dhammaan tilmaamaha badqabka maxaliga ah ee goobta dugsiga iyo nashaadaadka, uuna ku jiro basku.

**Saxeexyada hoos ku qoran, waxaan ku qireynaa inaan helnay oo aan dib u eegis ku samaynay waxyaabaha ku qoran Buug-yeraha Xuquuqaha & Waajibaadyada Ardayga & Qoyska ee Dugsiyada Dadweynaha Federal Way (FWPS) 2024–25.**

| | | |
|---|---|---|
| ______________________ | ______________________ | ______________________ |
| Magaca Waalidka/Mas’uulka, Kan Koowaad iyo Awoowga (xaruuf waa wayn) | Magaca Ardayga-aqoonyahanka, Kan Koowaad iyo Awoowga (xaruuf waa wayn) | Lambarka Aqoonsiga Ardayga-aqoonyahanka |
| ______________________ | ______________________ | ______________________ |
| Saxiixa Waalidka/Masuulka | Saxiixa Ardayga-aqoonyahanka | Fasalka |
| ______________________ | ______________________ | |
| Taariikh | Taariikh | |

(Qiritaanka helidda waxaa lagu dhameystitri karaa onleen ahaan ama in loo gudbiyo warqada la daawacay oo saxiixan dugisaga ardeygaaga.)

Boggan si ula kac ah ayaa looga tagay.

## Hawlaha iyo Ciyaaraha Fudud

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxay rumeesan yihiin hawlaha iyo ciyaaraha fudud inay yihiin doorar wanaagsan oo lagu bixiyo waayo aragnimo waxbarasho oo fahan iyo xujo leh oo la siiyo dhamaan ardeyda. Hadafyada barnaamijyada hawlaha iyo ciyaaraha fudud ayaa ah in la baro la dhaqanka wanaagsan ee ciyaaraha, wada shaqeynta, iyo ixtiraamka dadka kula tartamaya, garsoorayaasha, xubnayaasha kooxda ka soo hor jeeda, iyo taageerayaasha kooxda ka soo hor jeeda. **Siyaasada 2151 iyo Habraaca 2151P**

Si taas loo gaaro, degmada waxay leedahay aaminaada soo socota:

1. Ka qaybgalka barnaamij kasta oo hawl ama ciyaaro fufud ah waxay ku xiran tahay guul ka gaarida ardeyga ee heerarka tacliinta iyo xaadirida joogtada ah ee fassalada dhamaan.
2. Ardeyda ka qaybgaleysa barnaamij kasta oo hawl ama ciyaaro fufud ah waxay diirada saari doonaan barashada iyo horusocodka, shaqsi ahaan iyo xubin koox ahaan labaduba.
3. La-taliyaasha iyo tabbabarayaasha hawsha ayaa baraya, ugu celcelinaya, oo ka dhalinayo ixtiraam, mas'uuliyad, iyo daacadnimo. Ardeyga ka qaybgalayaasha waxay muujin doonaan tilmaamahan.
4. La-taliyaasha iyo tabbabarayaasha hawsha waxay kaga qaybgelin qoysaska waxbarashada iyo horumarka ardeydooda la-hawlgalayaal ahaan.
5. Ujeedada iyo hadafyada ee dhamaan barnaamij hawla iyo/ama ciyaaraha fufud waxaa si cad loogu sharraxi doonaa oo loogu qeexi doonaa ardeyda iyo waalidka/mas'uulka (iinta).
6. Dhamaan shuruudaha iyo heerarka ciyaaraha fudud Washington Interscholastic Activities Association (WIAA) (Ururka Hawlaha Ka-dhaxeeya Dusiyada ee Washington) iyo North Puget Sound League (NPSL) (Horyaalka Waqooyiga Puget Sound) wey shaqeenayaan si looga caawiyo ardeyda ciyaara fudud badbaadada iyo u qalmida ciyaaryahanka ee buuga ciyaaraha fudud ee laga helo bogga intarnetka ee degmada. **Fadlan ka codso Buug-gacmeedka Ciyaaraha Fudud agaasimaha ciyaaraha fudud ee dugsigaada.**

Si ay ugu matalaan bulshadeena, dugsigeena, iyo naftooda tartamada ama ciyaaraha kaladuwan ee dugsiyada u dhaxeeya, ardayda ayaa masuul ka ah, ka walaacsan caafimaadkooda, kana fogaada isticmaalka daroogada, khamriga, iyo/ama wax kasta oo tubaako ah (oo ay ku jiraan sigaarka elektiroonigga ah iyo uumiga).




## QORSHAHA ISTIRAATIIJIGA

**Arday kasta oo uu yeesho kalsooni dhaqanka sida arday ahaan oo si taxadar leh u isticmaala aqoontiisa/aqoonteeda iyo xirfadaha u khibrada cusub oo kala duwan.**

*Hawlaha ka baxsan waxbarashada waxay bixiyaan wado lagu xoojiyo casharrada lagu soo bartay fasalka, iyada oo la siinayo ardeyda fursad ay ugu adeegsadaan xirfadaha tacliimeed xaaladda dhabta ah ee dunida, sidaas awgeedna waxaa loo tixgeliyaa inay qayb ka yihiin waxbarasho si habsami leh u socota.*

*Xarunta Qaranka ee Istaatistikada Waxbarashada*

## QORSHAHA ISTIRAATIIJIGA

### 3 *Ardayda Firfircoon:* KU HAWLAN, FIKIREYAASHA HALISTA AH OO LA XOOJIYAY

Arday kasta caalim ah waa lala xoojin doonaa lahaanshaha waxbarashadooda waxaana si buuxda logu hawlan doonaa si ay noqdaaan mufakiriintii xaaladaha halista ah iyo hal abuureyaasha.

*Soo xaadirida waxay saadaal u tahay guusha ardeyga, waxayna saameyn ku yeelan kartaa horuso-codka waxbarashada ardeyga laga soo billaabo dugsiga xannaanada.*

*Ardeyga waxay galayaan halis tacliin ahaan hadii ay gooyaan 10 boqolkiiba sanad dugsiyeedka, ama ku dhawaad 18 maalmood. Marki ganbis badan la sameeyo, waxay sameyn kartaa waxbarashada, iyada oo aan loo eegin hadii ganbisyada fasax loo qaatay ama loo qaadan.*

- *Xaadirida dugsiga waqtiga saxda ah, maalinta dhan, maalin walba waxay ardeygaaga u sahli kartaa fursada ugu muhiimsan ee ka qallin-jebinta dusgiga sare.*
- *Laga soo bilaabo dugsiga xan-naanada, goynta celcelis ahaan labo maalin bishi, hadii fasax loo qaatay iyo hadii kalaba, waxay suuraga-lineysa in ardeygaaga uusan ka soo bixin heerarka tacliinta ee xisaabta iyo akhrinta ee fasalka 3-aad.*
- *Faslka 6-aad, ganbiska waxay kamid tahay saddex calaamadood in arde-gyga uu dugsiga iskaga hari rabo.*
- *Ganbiska wuxuu calaamad u noqon karaa inuu ardeyga ka xiisa bee-layo dugsiga, uu la dhibaatoonayo shaqada dusgiga, uu la kulmo xoog sheegasho ama uu wajaho dhibaa-tooyin kale suuragal ah inay halis yihiin.*
- *Fasalka 9-aad, soo xaadirida joog-tada ah waxay saadaal wanaagsan u tahay heerarka ka qallin-jebinta dugsiga sare si ka wanaagsan natii-jooyinka imtixaanka fasalka 8-aad.*

# Arimaha Soo Xaadirida

## Maalin Walba iyo Heer Fasaleed Kasta Waa Muhiim!

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxay aaminsan tahay soo xaadirida fasalka maalin walba inay tahay mid kamid ah tilmaamaha ugu muhiimsan guusha ardeyga. Dugsi kaste wuxuu ku hawlan yahay inuu bixiyo adeegyo tallo-bixin si gacan looga geysto baahiyaha bulshada iyo dareenka ee ardeeyda iyoqoysaska. Intaas waxaa dheeer, degmadeena waxay taageero bartilmaameedsan siisaa ardeyda guri la'aanta heysata. **Siyaasada 3121, 3122 iyo Habraacyada 3122P**

- Waqtiga dugsiga kahore ayaa ah waqti fiican oo lagu yeelan karo dhaqanka soo xaadirada wanaagsan. Caruurta yaryarka ee waqtiga dugsiga kahore maqnaanshahooda badan yahay sidookale waxay lumiyaan waqti waxbarasho qiima leh oo, hadii ganbiska joogtada ah ay la tagaan dugsiga xannaanada, waxay hoos u dhigi kartaa wax-qabadka tacliinta.
- Daraasada ayaa muujiya in carruur badan oo maalmo badan ka maqnaada dugsiga xannaanada iyo fasalka 1aad ay tacliin ahaan u harjadi karaan sanadada danbe. Inta badan waxay ku dhibaatoodaan inay ka adkaadaan akhriska dhamaadka fasalka 3aad.
- Dugsiga dhexe iyo sare, maqnaanshaha faraha badan waa calaamad digniin tan ugu sareeysa ee in ardayga uu ka tagi doono dugsiga.
- Hadii uu cunugaaga 3 jeer uu gooyo hal bil fasax la'aan, sharciga gobalka **(RCW 28A.225.020)** wuxuu farayaa inaan idiin qorsheyno kulan adiga iyo cunugaaga.
- Dugsiga hoose, kadib shan maqnaansho oo bil gudaheeda ah, ama toban ama in ka badan oo maqnaansho ah oo sannad dugsiyeed gudahiisa ah, degmada iskuulka waxaa looga baahan yahay inay kula soo xiriiraan si ay u qorsheeyaan shir. Ujeedada shirkani waa in laga wada hadlo caqabadaha, agabka, iyo taageerada tacliimeed ee ardeyga si uu u dhamaystiro leyliyada uu seegay. Kulan looma baahna hadii cunugaaga uu keeno warqada dhakhtarka, ama uu ku sii dalbaday maqnaanshaha qoraal ahaan, oo qorshe la meel dhigay si cunugaaga tacliin ahaan dib ugu dhicin.
- Ka dib todobo maqnaasho oo cudurdaar la'aan ah bil gudaheed iyo xilli aan ka dambayn 15 maqnaansho oo cudurdaar la'aan ah sanad dugsiyeedka gudihiisa, degmada dugsigu waxay u gudbin maxkamada da'yarta codsiyo maqnaasha ah.

Kuwan soo socdo waa cudur daaryo loo qaadan karo maqnaanshaha:

- Ka qaybgalka barnaamijka hawl ama barasho oo uu oggalaaday degmada ama dugsiga;
- Jirro, xaalad caafimaad ama ballan caafimaad (oo ay kamid yihiin, balse ku koobneyn, caafimaad, latalin, ilkaha, indhaha, uurka, iyo daaweynta bukaan-jiifka ama bukaan-socodka ee maandooriye la qabsahada ama caafimaadka dhimirka) ee ardayga ama qofka sharci ahaan ardayga mas'uul ka ah;
- Xaaladda degdegga ah ee qoyska, oo ay kamid yihiin, balse aan ku koobneyn, geeri ama jirro qoys dhexdiisa ah;
- Ujeeddo diin ama dhaqan oo ay kamid tahy fulinta ciid diimeed ama ciid dhaqan ama kaqeybgalka barashada diinta ama dhaqanka;
- Maxkamad, dacwad garsoor, hawl maxkamad amartay ama adeegga xeerbeegtida;
- Barnaamijka booqashada dugsiga sare ka gadaal, dugsiga farsamada ama xirfad shaqo barasho, ama wareysiga deeqda waxbarasho;
- Hawlaha goobidda iyo samatabbixinta ee uu aqoonsan yahay gobolka ee la jaan qaadaya **RCW 28A.225.055**;
- Maqnaanshaha tooska ula xiriira hooy la'aanta ardayga ama daryeelka korsashada/xaalada ku tiirsanaanta;
- Maqnaanshaha ka dhashay ficil edbin/sixitaan ah (tusaale, ka joojinta iskoolka oo wakhti gaaban ama dheer ah, ka saarid degdeg ah oo la soo rogay iyada oo la raacayo **Cutubka 392-400 WAC** haddii ardaygu aanu heleyn adeegyo waxbarasho oo aanu ku diiwaan gashanayn hawlaha "koorsada waxbarasho" ee u qalma, sida lagu qeexay **WAC 392-121-107**);
- Maqnaansha la xiriira walaaca badbaadada ardayga, oo ay kamid yihiin maqnaanshaha la xiriira hanjabaada, weerarka, ama xoog u sheegashada;
- Hawsha si wada jir ah u oggolaadaan maamulaha (ama qof u xilsaaran) iyo waalidka, mas'uulka, ama qofka dhalinta yar ee xornimada leh, oo waafaqsan siyaasada degmada.

# Arimaha Soo Xaadirida *(Oo sii socda)*

Haddii aadan u soo xaadirin sabab ah in qof uu ku dhibaateeyo, ku cabsi geliyo ama kuu xoog sheegto, waxay noqotay arin culus waxaana la joogaa waqtigii la soo qori lahaa kaalmada qof weyn.

## Xeeladaha Wanaagsan ee Soo Xaadirada

Ardayda sida wanaagsan u soo xaadiraan waa inay hubsadaan waxyaabahan soo socda inay sameeyaan:

- Caafimaad qab ku joog, hurdo badan qaado, cun cunno dheellitiran, u dhaq gacmahaaga si joogto ah, oo hubi in aad la socotid tallaaladaada.
- Qorshe u sameeyso soo xaadirida wanaagsan. Soo dhaweyso nuqulka jadwal taariikheedka dugsiga.
- U sheeg waalidiintaada inay qabtaan ballamaha maalmaha ka baxsan maalinta iskuulka ama maalmaha aan iskuulka jirin.
- Oggoow waqtiga aad u baahan tahay inaad tagto boosteejadaada baska.
- La soco shaqada dugsigaaga. Ardeyda ayaa had iyo jeer ka walwala oo isku dayaya inay seegaan dugsiga hadii aysan sameynin shaqadooda guriga ama ay wax u aqrisan imtixaan. Kalsooni ku wajah maalin walba.

## Sharciga Soo Xaadirida ee Gobalka Washington

Waa khasab in dhammaan carruurta siddeed jirka ah iyo kuwa yar 18 sano ay dugsiga aadaan. Ilmuhu wuxuu yeelan doonaa mas'uuliyadda inuu xaadiro wakhti buuxa marka dugsiga uu socdo, ilaa cunugga laga soo diiwaangaliyo dugsi gaar ah oo la aqoonsan yahay ama guriga wax lagu baro ma ahane. Marka cunug lix jir ama toddobo sano jir ah uu galo dugsiga dadweynaha, waxaa markaa looga baahan yahay cunuga inuu xaadiro waalidkaasna wuxuu yeelanayaa mas'uuliyadda inuu hubiyo in cunugga uu xaadiro dugsiga inta uu furan yahay. Xaalada reeban ayuu kormeeraha guud u oggolaan karaa carruurta da'doodu tahay 15 sano ama ka weyn haddii cunuga uu leeyahay duruufo gaar ah. Liiska waxaa laga heli karaa booga intarnetka ee http://bit.ly/2tuSOj2.

## Fasaxa iyo Maqnaanshaha Muddada Dheer

- Maqnaanshaha horay loo sii qorsheeyay ee ka badan laba maalmood wuxuu u baahan yahay ogaysiis hore oo qoraal ah iyo oggolaansho maamule ugu yaraan saddex maalmood ka hor maqnaanshaha. Ka codsashada shaqada dib u barida macallimiinta ardeeyga ugu yaraan saddex maalmood ka hor, iyo raacida muddo xilliyeedyada loo qabtay soo celinta shaqada la dhammeeyay, ayaa ah habka ugu wanaagsan ee lagu xaqiijin karo in ardeyga uusan dib u dhicin. Maqnaanshaha horay loo sii diyaariyey waa in la codsadaa iyadoo la isticmaalayo Foomka Maqnaanshaha La Diyaariyey, oo laga heli karo dugsi kasta iyo khadka tooska ah. Fadlan si toos ah ula shaqee xafiiska dugsiga si loo xaqiijiyo in maqnaanshaha ardeyga si sax ah loo diiwaangeliyo codsiyadana loo gudbiyo si waafaqsan habraaca degmada.
- **Maqnaanshaha horay loo sii qorsheeya ee gaaraya ama ka badan 20 maalmood, ardeyda iyo/ama waalidka/mas'uuliyiinta waxaa looga baahan yahay inay ballan la sameystaan maamulaha dugsiga kahor inta uusan maqnaani ardeyga.** Ardeyga maqnaada 20 maalmood ama in ka badan oo isku xigta waxaa laga saari karaa dugsiga mana awoodi doono in dib fasalka loogu celiyo ama xitaa dugsiga horay looga diiwaangaliyay. Fadlan la hadal maamulaha dugsigaaga haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah ama duruufo.
- Fadlan iskuday inaad jadwal u sameyso safarada la dheereeyay inta lagu jiro xilliyada fasaxa iskuulka (xagaaga, jiilaalka, fasaxa semesterka iyo fasaxa guga).

*Laga soo bilaabo dugsiga xannaanada kahore iyo dugsiga xannaanada carruurta, maqnaanshaha dabadadheer—maqnaanshaha 10 boqolkiiba sannad dugsiyeedka—ayaa ka dhigi kara ardayda fasalka seddexaad inay awoodi waayan inay si fiican wax u akhriyaan, fasalada lixaad inay la harjadaan shaqada koorsada, ardeyda dugsiga sare na ay gudaan wadada qalinjabinta.*

*Attendance Works*

## Xeeladaha Waalidiinta

- Kaliya ku hay cunugaaga guriga haddii ay dhab u jirran yihiin, sida qandho, matag, shuban, ama finanka faafa.
- Ka fogow ballamaha iyo safarka marka dugsigu uu jiro.
- Lasoco soo xaadirida dugsiga ee cunugaaga. Maqnaanshaha wax ka badan 9 maalmood, fasax iyo fasax la'aan, waxay halis u gelin kartaa cunuggaaga inuu dib u dhaco.
- U deji waqti go'an oo uu seexdo soona tooso subaxi; dhammee shaqada guriga oo habeenki usii xirxir boorsada dhabarka.
- Qorshe la sii sameyso xubnaha qoyska, deriska, ama waalidiinta kale inay kuu geeyaan cunuggaaga dugsiga haddii wax dhacaan.




## QORSHAHA ISTIRAATIIJIGA

# 2

*Ilmaha Oo Dhan:*

**SHAKHSIYAAD KOBCAYA, KALSOONI LEH, MASUULLIYAD LEH**

Arday kasta waa la xoojin doonaa oo loo diyaarin doonaa si ay u horumariyaan masuuliyadda shakhsi ahaaneed si ay u noqon kuwa fiican, xubnaha wax soo saar leh ee bulshada.




**Su'aalaha quseeya dabeecada oo ay tahay duusiyada in la weeydiiyo:**

- *Maxay macalimiinta sameynayaan si ay u taageeraan aqoonsiga iyo dhaqanka cunugeyga?*
- *Maxey yihiin waxyaabaha laga filayo guuda ahaan dugsiga?*
- *Sidee ayay ardeyda kuu helaan caddeyn ama qiritaanka dugsiga?*
- *Sidee bay macallimiinta iyo maamulayaasha ugu jawaabaan dhaqanka khalkhalka/amni darida leh?*
- *Maxaan sameeyaa hadii aan u maleeyo in canuggayga loo xoog sheegto iyo/ama si xun loola dhaqmayo?*
- *Goorma ayey kulmaan kooxdaada PBIS? Sidee ayaan uga mid noqon karaa kooxda PBIS?*
- *Sidee ayaa looga isticmaalaa Dhaqamada Wanaajinta Xiriirka Dadka dugsiga dhexdiisa?*
- *Sidee ayaan ku heli karaa qalabka taageerada barnaamijka Second Step si aan uga isticmaalo guriga?*

# Macluumaadka Akhlaaqda

## WAXBARASHADA DAREENKA BULSHADA

**Barashada bulshada iyo shucuurta (SEL)** waa hannanka ay caruurta iyo dadka waaweyn ku hantaan oo si wax ku ool ah ugu adeegsadaan aqoonta, dabeecada, iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah fahamka iyo maareeynta shucuurta, dejinta iyo gaaritaanka hadafyada wanaagsan, dareemida iyo u muujiyaan damqashada dadka kale, dhisida iyo ilaalinta dabeecadaha wanaagsan.

**Dhaqancelinta Dabeecada iyo Taageerada Wanaagsan ee Ka Jawaabcelisa Dhaqanka (CR-PBIS)** waa qaab-dhismeed, lagu dhiso dhaqanka bulshada iyo taageerooyinka dabeecadda ee loo baahan yahay si dugsiyada u noqdaan kuwo tayo leh, hufan, oo jawi waxbarasho oo siman leh loogu talagalay dhammaan dugsiyada. Hadafka CR-PBIS waa in diirada la saaro ka hortagga dabeecadaha dhibaatada leh iyada oo lala shaqeynayo shaqaalaha, qoysaska, ardeyda, iyo bulshada si loo qeexo, wax loo baro, loo aqoonsado, loona taageero ardeyda si ay uga soo baxaan filashooyinka dabeecadaha ee guud ahaan dugsiga. CR-PBIS waxay ka taageertaa dugsiyada inay noqdaan kuwa la sii saadaalin karo, joogteyn leh, wanaagsan, oo badbaado u ah dhammaan.


**Dhaqamada Wanaajinta Xiriirka Dadka** waxaa laga isticmaalaa dugisga iyo fasalka dhexdiisa si gacan looga geysto abuurida deegaan daryeel iyo taageero leh. Dhaqamada wanaajinta xiriirka dadka waxay ka dhasheen aaminaada ah kobcinta cilaaqaadka wanaagsan, ka shaqeynta dhibaata xallinta iyo dib u xallinta khilaafaadka, iyo hagaajinta waxyeelada ka dhalatay ficilada shaqsiyaadka iyo kooxa inay horseedi doonto deegaan waxbarasho waxtar badan, naxariis leh.

**Talaabada labaad** waa manhajka waxbarashada shucuurta bulshada oo lagu baxto heerka dugsiga hoose (dugsiga barbaarinta ilaa fasalka 5aad) Waxay kordhisaa guusha ardayda waxayna yareysaa habdhaqannada xunxun ayadoo bareysa xirfadaha waxbarashada iyo sidoo kale sida loo maareeyo dareennada, loo xaliyo caqabadaha, loona samaysto saaxiibo. Waaxda Kahortaga Xoog Sheegashada ayaa sidoo kale lagu baraa fasallada K-5 waxaana ku jira aqoonsiga, soo sheegista, iyo diidista habdhaqanka xoog sheegashada iyo sidoo kale qaababka si wanaagsan loogula dhaqmo dadka kaa agdhow.

**Awooda Shaqsiyada** waa manhaj waxbarashada shucuurta bulshanimada ah oo lagu dhigto dugsiga sare (fasallada 6-12). Waxaa lagu bartaa heerarka buuxa ee mawduucyada SEL ayadoo la adeegsanaayo qaababka la shaqeynaaya dhalinta qaangaarka galaysa, ayna ku jiraan: fahanka iyo maareynta shucuurta, dhimrinta iyo naxariista, mabaadii'da iyo ujeedooyinka, higsiyada iyo habdhaqannada, iyo hogaaminta iyo wada shaqeynta

Dugsiyada hoose, dhexe, iyo sare waxay adeegsan doonaan waxyaabo ka mid ah Dhaqancelinta Dabeecada iyo Taageerada Wanaagsan ee Ka Jawaabcelisa Dhaqanka (CR-PBIS), Barashada'ada Dareenka Bulshanimo, iyo Farsamooyinka Sixitaanka ah si loo taageero dhammaan ardayda.

Intaa waxaa dheer, dhammaan aqoonyahannada darajooyinka K-12 waxay ku hawlan yihiin casharrada dhalashada dhijitaalka ah. Dhalashada dhijitaalka ah waxaa loola jeedaa isticmaalka mas'uulka ah ee tignoolajiyada qof kasta oo isticmaala kombayutarada, internetka, iyo aaladaha dhijitaalka ah si uu ula macaamilo bulshada heer kasta oo ay tahay. Dhalashada dhijitaalka ah ee wanaagsan ee ardaydu waxay ka hawlgelisaa iyaga oo tustaa sidii ay isugu xidhi lahaayeen midba midka kale, isu naxariisan lahaa, oo u abuuri lahaa xidhiidh waara iyada oo loo marayo agabka dhijitaalka ah.



# Macluumaadka Akhlaaqda *(Oo sii socda)*

Golaha Agaasimayaasha ee Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxay qaateen **Siyaasada 3240** ee sharaxeysa sharciyada habdhaqanka ardeyga. Sida lagu qeexay **Siyaasada 3241**, ku xadgudubka sharciyada anshaxa ee noocaas ah waxay horseedi kartaa tillaabooyin edbin ama sixitaan ah. Habraacyada talaabooyinka sixitaanka waxaa lagu dejiyay **Siyaasada 3241P**. Iyada oo laga jawaabayo isbeddelada sharciga gobolka, macluumaadka ka muuqda bogaggan waa soo-koobitaanka la isku geeyay ee qodobbada muhiimka ah ee laga soo qaatay siyaasadaha/ habraacyada dib loo eegay. Qoraalka dhameystiran ee dukumiintiyadaas, oo ay ku jiraan wixii cusboonaysiin ah, waxaa laga heli karaa bogga intarnetka ee **https://www.fwps.org/about-us/administrative-policies-procedures**.

## XUQUUQDA ARDAYDA EE ANSHAXA

Degmadu si sharci darro ah uma takoori doonto arday takoorkaas oo ku saleysan jinsi, jinsiyad, caqiido, diin, midab, asal qaran, aqoonsiga galmada, muujinta jinsiga, aqoonsiga jinsiga, naafonimo, ama isticmaalka ey hageah oo tababaran ama xayawaan adeege ah.

Xaqa uu ardeyga u leeyahay dhigashada dugsiga dadweynaha loogama qaadi karo edbin aawgeed ilaa iyo dugsi uu ardeyda ka siinayo "dacwad dhageeysi" ma ahane. Tani macnaheeda waxay tahay in ardeyda ay fursad u helaan inay maqlaan xukunka lagu eedeeyay inay jabiyeen, lagala taliyo cadeymaha ka dhanka ah, fursadna ay u helaan inay dhinacooda ka hadlaan.

Waxaan aaminsanahay in arday walba uu leeyahay cod, uu qiimo ku soo kordhiyo hanaanka wax barashada, oo uu wax ku baran karo heerarka ugu sareeya. Abuurista shuruudahan, qoysaska iyo shaqaalaha waa inay iskaashi yeeshaan si ay u dhisaan nidaamyada taageerada dabeecadda guud ahaan dugsiga kuwaas oo siinaya ardey kasta fursad uu ku dejisto hadafyo, uu ku saxo waxyeellada ama anshax xumada ama saameynta anashax xumada, oo uu ku soo celiyo cilaaqaadka kala dhexeeyay kuwa la saameeyay. Dugsiyada dhamaan waxaa ka go'an abuurista deegaan waxbarasho nabadgelyo ah, daryeel leh. Fadlan kala xiriir dugsigaaga wixii macluumaad gaar ah oo ku saabsan xeeladaha ay xubnaha shaqaalaha u adeegsadaan in lagu xoojiyo filashooyinka guud ahaan dugsiga iyo dabaaldegyada.

Waxaan aaminsanahay oo aan xushmeyneynaa sirta ardayda. Xuquuqaha ardeyda ayaa lagu ilaaliyaa Family Educational Rights and Privacy Act (FERPA) (Xeerka Xuquuqda Waxbarashada iyo Qarsoodiga ee Qoyska).

Arday kasta waxaa loo awood siin doono loona diyaarin doono inuu yeesho mas'uuliyad shaqsiyeed si uu u noqdo mid wanaagsan, xubin bulshada wax ku soo kordhiya. Dhammaan dugsiyada waxay saaran yihiin taxanaha hirgelinta PBIS sidii hab wax ku ool ah, ballaaran oo lagu taageerayo dhammaan ardeyda iyada oo la abuurayo dugsiyo badbaado leh, daryeel leh.

## ANSHAXA ARDAYGA

Degmadu waxay xaqiijin doontaa inay dhammaan isgaarsiinta la xiriirta edbinta ee loogu baahan yahay siyaasaddan iyo habraacan ku bixiyaan luuqad ay ardayga iyo waalidiintu fahmi karaan, oo ay ku jiraan ogeysiisyada, dhageysiyada, shirarka, kulamada, qorshooyinka, dacwadaha, heshiisyada, codsiyada, iyo go'aannada. Dadaalkani wuxuu u baahan karaa caawimaad xagga luqadda ah oo loogu talagalay ardayda iyo waalidiinta leh aqoon xaddidan oo xagga Ingiriisiga ah sida ku xusan Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ee 1964. Dadaalkani wuxuu u baahan karaa in qorshooyin loo sameeyo waalidiinta iyo ardayda naafada ka ah xagga isgaarsiinta. Haddii Degmadu ay awoodi weydo inay tarjumaadda waxyaabaha qoran ku bixiso wakhti fiican, Degmadu waxay bixin doontaa fasiraadda qoraaladaas oo hadal ahaan ah. Waalidiinta aan awoodin inay akhriyaan luqad kasta, degmadu waxay waxyaabahaas ku bixin doontaa iyagoo cod ah.

Dhamaan ardeyda waxay yimaadaan dugsiga waxayna rabaan inay wax bartaan. Si kastaba ha noqotee, markay ardeyda qaataan doorar qaldan, tallaabooyin sixitaan ayaa laga lagama maarmaan noqda.

- **Tallaabada sixitaanka ah waxaa** ka mid noqon kara waxyaabaha soo socda: ka saarida fasalka muddo aan ka badnayn dheelitirka muddada fasalka xiga (marka laga reebo hakinta), eryitaanka, ama ka saarida degdegga ah ee fasal, maado, ama hawl.
- **Tallaabada sixitaanka** ah waxay sidoo kale ka dhigan tahay ka saarista ardeyga nooc kasta oo ah hawl, munaasabad isboorti ama gaadiid raacida uu qabto ay ama loo qabto iyada oo lagu matalayo degmada dugsiga.
- **Ka saarida fasalka** waxaa loola jeedaa ka saarida ardeyga fasalka, waqtiga waxbarida ama aagga waxqabadka xadgudubyada akhlaaqda awgeed **(WAC 392-400-430 iyo 392-400-335)**. Ka saarida fasalka kuma jirto talaabo keeni karta cashiro in la seego muddo gaaban markii:
  - Macallin ama shaqaalaha kale ee dugsiga uu isku dayo habab kale oo edbin ah si uu uga taageero ardeyga inuu ka soo baxo filashooyinka dabeecadeed; oo
  - Ardeygana uusii hoos joogo kormeerka macalinka ama shaqaalaha kale ee dugsiga inta lagu gudajiro mudadaas kooban.

  **Hannaanka cabashada ka saarida fasalka:**

  - Waalid/mas'uul ama ardey kasta oo ka cabanaya tallaabada ka saarida fasalka wuxuu xaq u leeyahay inuu kulan aan rasmi ahayn la yeesho maamulaha si loo xaliyo cabashada.
  - Kulanka noocan ah, ardeyga iyo waalidka waxay fursad u heli doonaan inay ka hadlaan arrimaha iyo walaacyada la xiriira cabashada oo ay weydiiyaan su'aalo xubnaha shaqaalaha ee ku lugta leh arrinta cabashada. Shaqaalaha waxay heli doonaan fursad ay kaga jawaabaan arrimaha iyo su'aalaha la xiriira arrinta cabashada. Intaas waxaa sii dheer, maamulaha wuxuu heli doonaa fursad uu kaga hadlo arrimaha iyo su'aalaha la soo qaaday oo uu ku weydiiyo su'aalo waalidiinta, ardeyda, iyo xubnaha shaqaalaha.
  - Haddii kadib adeegsiga daawadan aan wali xal loo helin cabashada, waalidka iyo ardeyga waxay xaq u leeyihiin, iyaga oo diraya ogeeysiis laba (2) maalmood oo maalmaha shaqada dugsiga kahore, inay u gudbiyaan cabsho qoraal ah iyo/ ama afka ah kormeeraha guud ama wakiilka. Kormeeraha guud ama qofka loo wakiishay ayaa ku siin doona waalidiinta iyo ardeyda nuqul qoraal ah oo ka jawaaba cabashadooda toban (10) maalmood gudahood maalmaha shaqada ay jirto.

# Macluumaadka Akhlaaqda *(Oo sii socda)*

## DABEECDA SAHLAN IYO MIDA WAYN

**Dabeecada Dhibaatada leh ee Sahlan** waa dabeecad iyo jawaabcelin oo lagu diiwaangeliyo laguna maareeyo fasalka dhexdiisa. **Dabeecada Dhibaatada leh ee Wayn** waa dabeecad la diiwaangeliyo inta badanna u baahan taageerada shaqaala dheeraad ah (tusaale. la-taliyaasha, maamulka, iwm) oo ka baxsan fasalka dhexdiisa.

Marka shaqaalaha dugsiga ay kula kulmaan arin weyn ama yar dugsiga dhexdiisa, waxaa la qoraa ardeyda ku lug lahaa, goobta iyo waqtiga ay wax dheceen, wixii dhacay (dabeecada dhibaatada leh ee la arkay), iyo sababta ay u dhacday.

## HAKINTA IYO ERYIDDA

**Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way waxay ku shaqeeyaan sharciga iyo qawaaniinta gobolka ee la xidhiidha ka joojinta iskoolka ee muddada-gaaban, ka joojinta muddada dheer, cayrinta, iyo ka saarida degdega ah. (WAC 392-400-430** ilaa **392-400-475)**

- **Hakinta Waxbarashada Dugsiga Laga Bixin (ISS)** waa hakin ardeyga looga saaro goobta cashirada joogtada ah ee ardeyga balse ku nagaada dhismaaha dugsiga waqtigaas ilaa iyo 10 maalmood oo isku xigta oo dugsiga uu jiro.
- **Hakinta Muddada Gaaban (STS)** waxay ka dhigan tahay hakin ardeyga looga saarayo dugsiga ilaa toban maalmood oo isku xiga.
- **Hakinta Muddada Dheer (LTS)** waxay ka dhigan tahay hakin ardeyga looga saarayo dugsiga wax ka badan toban maalmood oo isku xiga oo aan ka badnaan karin hal samester (90 maalmood). Ma jirto hakin mudda dheer oo la soo rogi karo waqti ka baxsan sanad dugsiyeedka ardeyga uu anshax xumada sameeyay.
- **Eryidaa** waxay ka dhigan tahay in loo diido qaablilaada dugsiga hadda uu dhigto ardeyga iyada oo jawaab u ah xadgudub dhaqan. **(WAC 392-400-430 ilaa iyo 392-400-480)** Anshax xumada ku lug leh haysashada hub dhab ah waxay sababi doontaa in ardayga la ceyriyo muddo hal sano ah, iyada oo ku xiran go'aanka kormeeraha guud uu wax kaga beddelayo eryidda oo ku saleysan hanaanka kiis walba u qaas ah. **(RCW 28A.600.420) Eeg Siyaasada 4210**.
- **Ka saarida Degdegga ah** macneheedu waa ka saarida aqoonyahanka iskoolka sababtoo ah weedhaha ama habdhaqanka aqoonyahanku waxay ku keenayaan khatar degdeg ah oo joogto ah aqoonyahannada ama shaqaalaha ama carqaladayn wayn oo ka dhan ah hor u socodka waxbarashada. Ka saarida degdega ah waa in la soo afjaraa ama loo beddelaa qaab kale oo tallaabo edbin ah 10 maalmood gudahooda. (**WAC 392-400-510** ilaa **392-400-530**) Degmadu ma soo rogi karto ka saarid degdeg ah keliya si loo baadho habdhaqanka aqoonyahanka.

Marka laga reebo dabeecadaha lagu sheegay Siyaasadda 3420 ee lagu mutaysan karo ka-hakinta imaanshaha dugsiga ee muddada-dheer ah dambiga ugu horreeya (eeg bogga 12), ma jiro arday laga hakin doono imaanshaha dugsiga marka laga reebo haddii qaab kale oo edbineed oo macquul ah loo arkay in wax looga bedeli karo dhaqankiisa ama dhaqankeeda, mar horena lagu tijaabiyey ardaygaas sababo la xiriira dembi noocaas ah uu galay awgeed.

Hakinta waxbarashada iyo cayrinta waxaa ka mid noqon doona diidmada aqbalaada gelitaanka hantida ma guurtada ah iyo mida caadiga ah oo ay leedahay, kiraysatay, ama maamusho degmada.

**Shaqooyinka Lisku Diro iyo Imtixaanada**

Dugsiga waa inuu fursad u siiyo ardeyga inuu dib sameeyo shaqooyinka lisku diro iyo imtixaanada ee dhaafay inta uu ku maqnaa fasalka laga saaray. **Habraaca 3241P**

### Hakinta Waxbarashada Dugsiga Laga Bixin

- Ka hor inta aysan soo rogin hakinta waxbarashada dugsiga laga bixin, xubnaha shaqaalaha waa inay marka hore isku dayaan mid ama dhowr nooc oo edbin ah si uu uga taageero ardeyga inuu ka soo baxo filashooyinka dabeecadeed oo ay tixgeliyaan duruufaha shaqsiyeed ee ardeyga.
- Degmada ma soo rogi doonto hakinta waxbarashada dugsiga laga bixin oo sababi karta diidmada ama daahitaanka cunnooyinka nafaqada leh ee ku filan ardeyga.

### Hakinta Muddada Gaaban

- Ma jiri doonto arday ku jira dugsiga xanaanada carruurta ilaa iyo fasalka afaraad lagu soo rogi doono hakinta muddada gaaban wax kabadan 10 maalmood oo dugasiga uu jiro oo isku aruuray semestar kasta.
- Ma dhici doonto in fasal ama dhibca ay u lumaan ganaax hakin waxbarasho aawgeed.
- Ma jiri doonto arday ku jira fasalka shanaad in lagu soo rogi doono hakinta muddada gaaban wax kabadan 15 maalmood oo dugasiga uu jiro oo isku aruuray hal semestar.
- Kahor hakinta waxbarashada, shir ayaa lala yeelan doonaa ardeyga kaas oo ogeysiis oraah iyo qoraal ah oo ku saabsan anshax xumada iyo xadgudubka la soo eedeeyay, cadaymaha taageeraya dacwadda, iyo tallaabada edbinta la qaadayo lagu bixin doono. Kadib ardeyga ayaa loo siin doonaa fursad uu kaga dhaho waxa ay la tahay asaga/ayada. Ka hor intaadan fulinin cayrinta muddada-gaaban ah, iskuulku waa inuu isku dayaa inuu ogeysiiyo waalidiinta ardayda, sida ugu dhaqsaha badan ee macquulsan ee la xiriira xadgudubka anshaxa.
- Ardey ama waalid/mas'uuul kasta oo aqbali waaya edbin la soo jeediyay ama hakinta waxbarashada muddada gaaban ah wuxuu xaq u leeyahay kulan ikhtiyaar ah oo lala yeesho maamulaha dugsiga/wakiilkiisa ujeedkana uu yahay xallinta cabashada iyo xuquuqda uu u leeyahay rafcaan ka qaadashada Xafiiska Kormeeraha Guud.

### Hakinta iyo Eryidda Muddada Dheer

- Ma dhici doono in ardey ku jira fasalka dugsiga xannaanada ilaa iyo fasalka afaraad lagu soo rogo hakinta iyo eryidda muddada dheer marki laga reebo in ardeyga uu heysto hub dhab ah, mana dhici doonto in fasal ama dhibca ay u lumaan hakin waxbarasho aawgeed.
- Ma dhici doonto in ardey fasalka shanaand iyo ka kore ah lagu soo rogo hakinta muddada dheer oo sababi karta luminta fasalada/dhibcaha tacliinta.
- Hakinta muddada dheer lama soo rogi doono ilaa iyo ogeeysiis qoraal ah loogu soo diro ardeyga waalidka/mas'uulka boosta joogta ah ama shaqsi ahaan loogu keeno ama iimayl logu soo diro.

# Macluumaadka Akhlaaqda *(Oo sii socda)*

**Ogeeysiiska waa inuu wataa macluumaad ku saabsan waxyaabahan soo socda:**

- Faahfaahinta dhaqanka iyo sida dhaqanka ugu xadgudbay siyaasada degmada;
- Muddada iyo xaaladaha hakinta ama eryidda, oo ay kujiraan taariikhaha bilawga iyo dhammaadka;
- Noocyada kale ee edbinta ee la tixgeliyo iyo/ama la isku dayay;
- Xuquuqaha loo leeyahay kulank aikhtiyaariga ah ee lala yeesho maamulaha;
- Xuquuqda loo leeyahay rafcaanka iyo dacwad dhageysi in la qabto 3 maalmood dugsiga uu jiro oo edbinta la soo rogay gudahood;
- Sida loo codsado kulanka maamulaha iyo/ama rafcaanka;
- Macluumaadka dib u aqbalida;
- Ogaysiiska dib-u-keenista iskuulka waxaa lagu bixin doonaa luqad ay waalidka iyo ardayga fahmi karaan oo Degmadu waxay caawimaad xagga luqadda ah siin doontaa dadka aqoonta Ingiriisiga ku yar tahay iyadoo la raacayo Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ee 1964.

## Waqtiyada U Go'an Tallaabada Edbinta

Iyada oo la raacayo sharciga gobolka, ma jiro ardey muddo dheer laga hakin doono waxbarashada ama la eryi doono wax ka badan hal xilli waxbarasho, taas oo Dugsiyada Dadweynaha Federal Way ku qeexaan inay tahay hal simistar (90 maalmood oo dugsiga la dhiganayo) iyo wixii hakin waxbarasho ama eryitaan ah ma dhaafi doono wixii ka dambeeya sanad dugsiyeedka hadda.

## Adeegyada Waxbarashada

Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way kama joojin doonaan aqoonyahanka adeegyada waxbarasho si tallaabo sixitaan ah loo qaado. In kasta oo aqoonyahan laga yaabo in laga saaro fasal gaar ah ama goob hawl waxbarasho muddada ka joojinta ama ka saarida aan degdegga ahayn, aqoonyahanku wuxuu heli doonaa fursad uu ku helo adeegyada waxbarashada muddadaas. Adeegyada waxaa ku jiri kara akadeemiyadda Internetka, waxbarasho gooni ah, ama fursado kale.

## Edbinta Jabinta Anshaxa Ardeyga

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way uma adeegsan doonaan hakinta waxbarashada ma eryidda muddada-dheer qaab ah "edbinta jabinta anshaxa ardeyga" — oo macnaheedu yahay tallaabo edbin oo looga jawaab-celiyo hab-dhaqanka ardeyga ee xadgudubka ku ah xeerarka anshaxa ardeyga (ee laga helo **Siyaasada 3240**). Edbinta jabinta anshaxa ardeyga kuma jirto tallaabooyinka edbinta ah ee looga jawaab-celinayo dhaqanka ardeyga ee xadgudubka ku ah sharciyada gobolka qaarkood—sida haysashada hubka iyo dambiyada qaarkood ee rabshadaha wata, dambiyada daroogada, iyo dembiyada galmada—ama kuwa si xun saamayn ugu leh caafimaadka ama badbaadada ardeyda kale ama shaqaalaha. Wixii macluumaad dheerad ah ee ku saabsan edbinta jabinta anshaxa ardeyga, ka tixraac **RCW 28A.600.015**.

## Eryidda

- Ma jiri doono ardey la eryi doono ilaa iyo tallaabooyinka kale ee edbinta lagu dayo oo lagu guul dareysto in xal looga gaaro xaalada/dhaqanka. Tan kuma jiraan dhacdooyinka ku lug leh hubka.
- U qaadashada hub dhismayaasha dugsiga, gaadiidka dugsiga uu bixiyay, ama goobaha xarumaha waxay sababi kartaa eryid.
- Ardey waxaa loo eryi doonaa oo keliya xadgudubka sharciyada degmada. Nooca iyo duruufaha xadgudubku waa inuu si macquul ah sabab ugu noqon karo darnaanta eryida.
- Marka uu codsado maamulaha dugsiga, kormeeraha guud ayaa go'aansan kara in laga dheereeyo cayrinta waqti dhaafsiisan hal xilli waxbarasho, iyada oo ku xiran habraacyada dacwad dhageeysiga.
- Habraaca ogeysiiska ee eryida waxay la mid noqon doontaa hakinta waxbarashada muddada-dheer waxayna waafaqsanaan doontaa **Siyaasada 3241P**.

## Ka saarida Degdegga

- Aqoonyahannada waa la eryi doonaa isla markaaba marka ficilkoodu uu ku keeno khatar degdeg ah oo joogto ah aqoonyahannada kale ama shaqaalaha ama ku keeno carqaladayn wayn hor u socodka waxbarashada. Degmadu ma soo rogi karto ka saarid deg-deg ah keliya si loo baaro habdhaqanka aqoonyahanka.
- Ka saarida degdega ah waxay socon kartaa ilaa 10 maalmood hadii uusan (1) ka noqon kormeeraha guud ama wakiilkiisa ama (2) wax laga beddelin ama laga noqon ka dib dhageysi ama racfaan.
- 10 maalmood gudahooda ka dib ka saarida degdega ah ee iskoolka, ka saarida degdega ah waa in ay dhamaataa ama waa in loo beddelaa nooc kale oo edbin ah.
- Habka ogeysiiska ee ka saarida degdega ah waxay la mid noqon doontaa joojinta muddada dheer iyo cayrinta marka laga reebo qodobadan soo socda:
  - Ogeysiiska qoraalka ah waa in lagu geeyaa gacanta (isaga oo wata qirasho ama caddeyn qoraal ah); ama
  - Lagu soo shaabadeeyaa boostada 24 saacadood eryidda gudaheeda (iyada oo isku dayga in la waco waalidka/mas'uulka sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka a la sameeyay).
- Ardeyga ama waalidka/mas'uulka waxay haysan doonaan seddex maalmood oo maalmaha shaqada dugsiga ah oo ay ugu gudbinayaan codsi dacwad dhageysi Xafiiska Sinnaanta.

## Habraaca Dacwad Dhageysiga ee Hakinta iyo Eryidda Muddada Dheer

Dacwad dhageysiga hakinta iyo eryidda muddada dheer wuxuu ku bilaabmi doonaa ***seddex (3) maalmood gudahood maalmaha shaqada dugsiga*** kadib markuu maamulka dugsiga helo codsiga noocas ah waxaana qaadi doono sarkaal dacwad dhageysi. Dukumiintiyada iyo cadeymaha kale ee gacanta lagu hayo waxaa baari kara ardeyda, waalidiinta/mas'uuliyiinta, iyo mas'uuliyiinta dugsiga ka hor dacwad dhageysiga.

**Ardeyda ayaa ku yeelan doona xuquuqaha soo socda dacwad dhageysiga:**

- Fursadda in wakiil uu matalo;
- Fursad uu ku muujiyo sharraxaadiisa/sharraxaadeeda;
- Fursad uu ku soo bandhigo caddeyn iyo marqaatiyo;
- Fursad uu ku su'aalo oo uu kaga soo horjeesto marqaatiyada.

### Dib U Eegista iyo Dib Uga Fiirsasahada ay Sameeyaan Guddiga Agaasimayaasha

Codsiga in ardeyga uu doonayo inuu rafcaan ka qaato go'aanka xafiiska dacwad dhagaysiga waa in loo gudbiyaa xafiiska kormeeraha Guud shan maalmood oo maalmaha shaqada gudahooda ah kadib markii la helo go'aanka dacwad dhageysiga. Guddiga dugsiga ayaa codsan kara inuu la kulmo ardeyga ama waalidiinta, maamulaha, markhaatiyada ama shaqaalaha dugsiga si ay u dhagaystaan doodo dheeraad ah oo ay u ururiyaan macluumaad dheeraad ah. Golaha dugsiga waa inuu ku siiyaa go'aan qoraal ah ardeyga iyo waalidiinta shan maalmood oo maalmaha shaqada gudahooda ah kadib markay heleen codsiga dib u eegista iyo tixgelinta.

**Habraaca cabashada iyo racfaanka oo dhameystiran waxaa laga heli karaa Siyaasada 3241 iyo Habraaca 3241P.**

***Dib U Qaabilidda:*** Ardey kasta oo laga hakiyay waxbarashada ama laga eryey wuxuu dalban karaa dib u qaabilid wakhti kasta isagoo codsi qoraal ah u gudbinaya kormeeraha guud. Warqadda waxaa kamid noqon doona sababaha dib u qaabilida, caddeynta taageeraysa codsiga, iyo macluumaadka kale ee looga baahan yahay **Siyaasada 3241P.** Kormeeraha guud ama qofka loo wakiishay ayaa qoraal ahaan uga soo jawaabaya. Xaaladaha qaarkood, kahor codsashada dib u qaabilidda, qiimeyn dheeraad ah, oo ay kamid yihiin balse aan ku xadidneyn, qiimeyn cilmi nafsi ama mid maskaxeed oo madax-bannaan, ayaa loo baahan yahay. Kharshka dhamaan qiimeynta ardeyga waxaa bixin doona qoyska. Ardeyga ayaa codsan kara in laga dhaafo isaga oo codsi u gudbinaya Xafiiska Kormeeraha Guud, oo muujineysa dhibaato dhaqaale.

***Dib u soo celinta:*** Degmada waxay samayn doontaa dadaallo ay ku caawineyso ardeyda muddo dheer laga hakiyay waxbarashada ama laga eryey inay dib ugu laabtaan goobta waxbarashada kahor iyo ugu dambayn taariikhda dhammaadka tallaabada edbinta. Degmada waxay u qaban doontaa kulan looga wada hadlayo qorshe dib loogu soo celinayo ardeyga barnaamijka dugsiga, ardeyga iyo waalidkiisa ama mas'uuliyiintiisa, muddo 20 maalmood gudahood waqtiga hakinta ama eryidda muddada-dheer iyo ugu dambeyn shan maalmood ka hor ku soo laabashada ardeyga dugsiga.

Dugsiga iyo/ama degmada waa inay abuuraan qorshe dib u soo noqosho shaqsiyan ah oo ku habboon duruufaha shaqsiyeed ee ardayga, oo ay kamid tahay tixgalinta dhacdada keentay hakinta iyo eryidda muddada dheer ee ardeyga.

Inta lagu guda jiro muddada ganaax dugsiyeed walba, ardeyda ma gali doonaan hantida ma guurtada ah iyo mida caadiga ah oo ay leedahay, kiraysatay, ama maamusho degmada oggalaanshaha hore ee maamulaha ama wakiilka dhisma la'aantiisa.

**Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way waxuu ka madax banaan yahay hubka, sigaar-cabbida, iyo xarumo ka madax banaan daroogada.**

### Edbinta Ardeyda Naafada ah

Habraaca edbinta ee loogu talagalay ardeyda naafada ah waxay la jaan qaadaysaa Xeerka Dadka Naafada ah (IDEA) iyo Qeybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta. Habraacyadan waxaa laga helaa **Ogeysiiska Illaalinta Habraacyada iyo Siyaasadaha iyo Habraacyada 2161/2161P iyo 2162/2162P ee Waxbarashada Gaarka** ah. Habraacyadan waxay ku shaqeeyaan shuruudaha soo socda:

- Ardeyga wuxuu leeyahay Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiyeed (IEP), Qorshaha Caafimaadka Shaqsiyeed (IHP), iyo/ama Qorshaha Qaybta 504.
- Ardeyga wali lama go'aaminin inuu u qalmo adeegyada Waxbarashada Gaarka ah, balse waalidka/mas'uulka ayaa walaac ugu muujiyey qoraal ahaan (ama hadal ahaan) shaqaalaha kormeeraha ama maamulka degmada, ama macallin, in ardeyga loo qiimeeyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira; ama waalidka/masuu'lka inuu codsaday in ardeyga loo qiimeeyo Waxbarashadda Gaarka ah; ama macallinka ama shaqaalaha kale ee dugsiga oo u muujiyay walaac gaar ah oo ku saabsan dhaqamo taxane ah oo uu muujiyay ardeyga Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah ama shaqaalaha kale ee kormeerka.



## Macluumaadka Akhlaaqda *(Oo sii socda)*

### DABEECADAHA HORSEEDI KARA FICILIDA EDBINTA IYO/AMA AKHLAAQDA

**Aamindarrada/Qishka Tacliinta:** Gudbinta ulakaca ah ee shaqada dadka kale ee ardeyga uu u gudbiyo inuu asaga leeyahay oo kale, ama inaad ka caawiso ardey kale inuu sidaas sameeyo, ama adeegsiga ilo la oggol yahay (tusaale ahaan: adiga oo aan xuseynin qofka shaqada iska leh).

**Khamri:** Soosaarida, iibinta, iibsashada, safrinta, haysashada, ama isticmaalka cabitaannada khamriga ee maandooriyaha ah ama waxyaabaha u taagan aalkolo oo kale ama ku xadgudubka **Siyaasada 3241P**.

**Wax ka Beddelka Diiwaanada:** Been abuurka, wax ka baddelida, ama baabi'inta diiwaan kaste oo dugsi uu leeyahay ama wixii wada xiriir ah ee ka dhexeeya guriga iyo dugsiga waa mamnuuc. Falka been abuurka ah ee loo adeegsado qorista magaca qof kale ama been abuurka waqtiyada, taariikhaha, fasalada, cinwaannada, ama xogaha kale ayaa mamnuuc ah.

**Dab Qabadsiinta:** Sababitda dab si oggaal ah iyo/ama ulakac ah waa mamnuuc.

**Weerar (Jir ahaan ah):** U adeegsiga xoog hal dhinac ah ama rabsho qof kale ayaa waa mamnuuc. Iyada oo loo raacayo **RCW 28A.635.090**, ardeyda si xoog ah ama rabsho leh faraha ula gala shaqaalaha dugsiga ama ardeyda kale waxaa lagu soo rogayaa hakin waxbarasho ama eryid degdeg ah.

**Weerar (Hadal ah):** U adeegsiga hanjabaada leh ee xoog hal dhinac ah ama rabsho qof kale ayaa waa mamnuuc. Iyada oo loo raacayo **RCW 28A.635.090**, ardeyda si xoog ah ama rabsho leh faraha ula gala shaqaalaha dugsiga ama ardeyda kale waxaa lagu soo rogayaa hakin waxbarasho ama eryid degdeg ah. Tan waxaa ka mid ah Hanjabaadaha Qaraxyada: Ku hanjabida qaraxa ama waxyeeleynta xarun ama hanti kasta oo dadweyne dugsiga leeyahay waa mamnuuc.

**Hanjabaadaha Qaraxyada:** Ku hanjabida qaraxa ama waxyeeleynta xarun ama hanti kasta oo dadweyne dugsiga leeyahay waa mamnuuc.

**Guri jabsashada:** Jabsashada dugsi iyada oo ujeedadu tahay in wax la xado iyo/ama la burburiyo waa mamnuuc.

**Dhaqanka Khatarta ah:** Ku lug lahaanshaha dhaqan uu qof caqli gal ah garan karo inay u keeneyso qatar dhaawac naftiisa ama dadka kale waa mamnuuc.

**Burburinta Hanti:** Jajabinta ama waxyeelada hantida dugsiga ama mida dadka kale ee ulakaca ah. **RCW 28A.635.060**

**Anshaxa Dhibaateynta leh:** Anshaxa ulakaca ah ee ka dhex abuura khalkhal dhismaha dugsiga ama faragelin ku sameeya nidaamka waxbarashadda waa mamnuuc, oo ay ku jirto luqadda aan habooneyn. Anshaxa noocaas ah waxaa kamid ah, balse aan ku ekeen:

- Ka hor-istaagga ardeyda inay galaan fasal ama hawl dugsiyeed;
- Fara la galida qaawan ee anshaxa fasalka ama hawl kasta;
- Dirista alaarmi been ah iyo/ama daminta alaarmiga.

**Labiska iyo Muuqaalka Dhibaateynta leh:** Labiska iyo muuqaalka waa inaysan keenin dhibaatooyin caafimaad ama badbaado, cabsi gelin dadka kale, ama aysan khalkhal keenin. **Siyaasada 3224; iyo Habraaca 3224P**

**Daroogo, Gaarsiin ama Haysashada Si Aad u Gaarsiiso:** Qaybinta, iibinta, ama haysashada iyada oo ujeedada tahay in la gudbiyo daroogo kasta ama walxaha maandooriyaha ee la xakameeyo.

**Daroogo, Sharci darro, Dukaanka Lagu Iibiyo, Isticmaalka Rijeetada ama Haysashada:** Isticmaalka ama haysashada sharci darrada ah daroogo kasta ama walxaha maandooriyaha ee la xakameeyo. Waxaa ka mid ah isticmaalka ama haysashada wixii dawooyinka rijeetda leh ama laga iibsado dukaanka (tusaale ahaan, asbiriin, sharoobada qufaca, kaniinada kafeega, daawada sanka lagu buufiyo).

**Walxaha qarxa:** Haysashada ama adeegsiga wax kasta oo la damacsan yahay ama loogu talagalay inuu ku qarxo xoog ama qalalaase, sida qoryaha wax duqeeya, rasaasta, ama bambadada tuubada ku jirta waa mamnuuc.

**Baada/Hanjabaada Sir-deynta/Khasbidda:** Ku helidda lacag ama hanti rabsahad ama ku hanjabida rabshad, ama ku qasbida qof inuu xoog wax ku qabto ama hanjabaada xooga waa mamnuuc.

**Diidista In Qof Lalal Shaqeeyo:** Diidista joogtada ah in loo hoggaansamo ama la raaco si macquul ah, tilmaamaha sharciga ah ama codsiyada macallimiinta ama shaqaalaha. Tani waxaa ka mid ah, balse aan ku koobneyn adeecid la'aan, diidmada, iyo ku guuldareysiga in lais aqoonsado.

**Dagaalka:** Ka qayb qaadashada dhacdo ku lug leh gacan ka hadal.

**Dabeecadda La Xiriira burcadda:** Ardeyda ka qeybqaata dhaqanka ama howlaha la xiriira burcadda ayaa laga qaadi doonaa tallaabo waxaana loo gudbin karaa masuuliyiinta fulinta sharciga ee ku haboon. Nooca labiska, dharka, howlaha, ficillada, habdhaqanka, ama qaabka is qurxinta ee loo soo bandhigay, la milicsaday, ama ay ka qeybgaleen ardeyda:

- Uma horseedi doonto hogaamiyaasha iskuulka inay si macquul ah u rumeeyaan in dhaqanka, dharka, howlaha, falalka, ama astaamaha kale ee noocaas ah ay laxiriiraan burcadda oo ay carqaladeynayaan ama faragelinayaan deeganka ama howsha fugsiga, ama ujeedooyinka waxbarashada;
- Uma keeni doonto khatarta badbaadada jireed naftooda, ardeyda ama shaqaalaha;
- Ma abuuri doonto jawi fayo-qabka ardeyga, xubinka shaqaalaha, ama qof kale uu si xun u saameeyo cadaadiska daran, dhaqanka, cabsi gelinta, tilmaamta cad, ama hanjabaada rabshada; ama
- Kuma muujin doonto xubin ka ahaanshaha ama ku xirnaanshaha burcaddda xiriir qoraal ah, sawirda jirka, sawirida, rinjiyeynta, naqshadeynta, astaan dugsi kasta ama hanti shaqsiyeed ama waxa qofka uu leeyahay.

**Siyaasadda 3225 iyo Habraaca 3225P**

# Macluumaadka Akhlaaqda *(Oo sii socda)*

## DABEECADAHA HORSEEDI KARA FICILIDA EDBINTA IYO/AMA AKHLAAQDA

**Dhibaataynta, Cabsi gelinta ama Xoog U Sheegasho:** Dhibaataynta, cabsi gelinta ama xoog u sheegashooo ah fariin kasta oo ulakac loo qoray ama sawir—ayna kujiraan kuwa khadka interneetka la iskudhaafsado—hadal, ama talaabo gacan qaad ah, ooyna kujiraan laakiin aan kukoobnayn mid u muuqda inuu salka kuhayo isir, midab, diinta, asalka qofka, wadanka u qofku udhashay, jinsi, dookha galmo ee qofka ayna kujiraan muujinta ama aqoonsiga jinsiga qofka, ama naafada jirka ama dhimirka, ama qaybha kale ee sifooyinka, marka fariinta kaska loo qoray, lagu hadlay, marka ficilka:

- Jir ahaan waxay dhaawaceysaa ardeyga ama waxay dhaawaceysaa hantida ardeyga; ama
- Waxay leedahay saamaynta faragelinta la taaban karo ee waxbarashada ardeyga; ama
- Uu aad udaran yahay, joogto yahay, ama saamayn badan heer uu abuuraayo deegaan waxbarasho oo ay ka jirto caga juglayn ama hanjabaad ah; ama
- Uu leeyahay saamayn uu si wayn carqalad ugu noqonaayo shaqooyinka caadiga ah ee dugsiga.

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way ahaan, waxaan ku hawlanahay inaan dammaanad qaad in arday kasta uu ogyahay, fahamsan yahay, oo uu oggalaado dhaqankooda iyo baahida waxbarashada u gaarka ah iyo mida kale, si ay ugu doodaan naftooda iyo dadka kaleba. **Siyaasada 3207 iyo Habraaca 3207P**

**Fadeexeyn:** Ardeyda kama qeybqaadan doonaan, ma qorsheyn doonaan inay ka qeybgalaan, ama kuma shirqooli doonaan dadka kale inay ka qeybqaataan ficillada fadeexeynta ama dhibaateynta leh ee dhaawacaya, hoos udhigaya ama ceebeyn kara, ama lala damacsan yahay in lagu dhaawaco, hoos loogu udhigo ama lagu ceebeyo shaqsiyaadka kale.

**Muujinta Kalgaceylka aan Habbooneyn:** Muujinta baanaanka lala imaado ee fcillada kalgaceylka ama galmada ku saleysan kuwaas oo buriya heerarka dhaqanka bulshada ee la aqbali karo waa mamnuuc.

**Qallimada If-bixiyaasha:** Adeegsiga iyo/ama heysashada qallimada If-bixiyaasha xaalad kaste oo uu macalinka kormeereeynin waa mamnuuc waxaana loo arki karaa dhaqan khatarta ah.

**Ka Bixida Dhismaha Inta Lagu Jiro Saacadaha Dugsiga:** Ardeyda waxaa looga baahan yahay inay ku nagaadaan badka dugsiga laga soo bilaabo waqtiga ay imaadeen hadii aan cudurdaar rasmi ah loo sameynin. Ardeyda ku lug leh howlaha ka baxsan dugsiga ee la ogolaaday inta lagu gudajiro saacadaha dugsiga waa inay haystaan kaar aqoonsiga banaanka loogu baxo oo rasmi ah. Booqashada dugsiyada kale waa inay horay usii ogolaadaan labada maamule.

**Qashin daadin:** Tuurista, ridista, ku keeydinta ama ku daadinta qashinka waa ka mamnuuc dhismaha degmada ee dugsiga dadweynaha.

**Meereysiga/Xadgudubka:** Inaad tagto meel aan laguu fasaxin ama inaad diiddo inaad ka baxdo marki sidaas laguugu amro waa mamnuuc. Meereysiga musqulaha, meelaha baabuurta la dhigto iyo meelaha xadka ka baxsan, iyo inaad diiddo inaad ka baxdo marki sidaas laguugu amro waa mamnuuc.

**Xashiishka Marijuana:** Isticmaal sharci darrada ah, beerista, qeybinta, iibinta, dalbashada, iibsashada, haysashada, ama gaadiidka ku qaadida xashiishadda.

**Gaariyada yaala Dhismaha Dugsiga:** Eeg bogga 28-aad.

**Carrada/Xiriirka Gcan Qaadka leh:** Habdhaqanka keena ama ku hanjabaya waxyeelada jireed aan halista ahayn balse aan habbooneyn ee loo geysto dadka kale.

**Dhaca:** Wax ka xadida shaqsi iyada oo xoog la adeegsanayo ama xoog lagu hanjabo waa mamnuuc.

**Qawlka Ardeyga:** Qawlka ardeyga ma noqon karto mid cay ah, wasqaanimo ah, fisqi ah, ama si cad u aflagaadeeya faragelinna ku sameeya xuquuqaha shaqsiyaadka kale.

**Wax Ku Dhex Iibinta Dugsiga:** Kaliya ururada u idman ayaa wax ku dhex iibin kara dhisamaha dugsiga ama munaasabadaha dugsiga.

**Anshaxa Galmada aan haboonayn:** Ficillada fisqiga ee la muujiyo, ha ahaato mid hadal ah ama mid aan hadal ahayn.

**Si Xun U Adeegsiga Tiknoolojiyada:** Tani waxay ka dhigan tahay talaabo kasta oo la qaado oo xadgudub ku ah Siyaasada Isticmaalka La Oggalyahay ee degmada ama siyaasad degmo kasta oo kale oo mamnuucaysa dhibaateynta, cabsi gelinta, ama dabeecadaha xoog u sheegashada, oo ay kamid yihin, balse aan ku xaddidnayn:

- Adeegsiga teknolojiyadda sida kombuyuutarrada, taleefannada gacanta, aaladdaha gacanta, taleefannada gacanta, iwm oo ay leedahay degmadu ama lagu isticmaalo aagga degmada, ama yaala munaasabad ay maalgalisay degmada in lagu kadeedo, loogu xoog sheegto, ama lagu cabsi geliyo ardey kasta, xubin shaqaale, ama isxilqaame degmo;
- Raadsashada ula kaca ah iyo/ama soo dejisashada waxyaabo edab darro ama fuxshi ah ama muuqaal ka duubida shaqsiyaad ayadoon fasax laga haysan;
- Gaarsiinta waxyaabaha edab darrada ama fuxshiga ee la soo dejistay dadka kale;
- Wax ka baddelida qalabka korantada, feylasha xogta, ama softiweeryada ama marin u helidda ama adeegsiga teknoolojiyadda noocaas ah ee aan fasax loo heeysanin. **Siyaasada 3245**

Aqoonyahannadu waxay u hoggaansami doonaan tilmaamaha isticmaalka la aqbali karo ee **Habraaca 2022.2P** marka la isticmaalayo nidaamyada macluumaadka elektaroonigga ah sida e-mailka, shabakadaha, iyo internetka. Arday kasta oo si xun u isticmaala aalad kadibna waxyeelo soo gaarto aalada, waa la ganaaxi doonaa.

**Xatooyada:** Qaadashada sharci darrada ah ee hantida qof kale ama hantida degmada waa mamnuuc.

**Hanjabaadaha Dilka ama Waxyeelo u Gaysashada Qof Kale (oo ay kujiraan "Liiska Dadka La Dili Rabo"):** Cabsi gelinta shaqaalaha dugsiga ama ardeyda kale ee hanjabaada tooska ah ee xoog ama rabshado waa mamnuuc.

**Tubaakada:** Isticmaalka ama haysashada alaabta tubaakada (ay ku jiraan sigaarka elektarooniga ah iyo qalabka 'vape'/uumiga) ee aqoonyahannada waa mamnuuc. **Sharciga 3248** iyo **4215**

## Macluumaadka Akhlaaqda *(Oo sii socda)*

### DABEECADAHA HORSEEDI KARA FICILIDA EDBINTA IYO/AMA AKHLAAQDA

**Xadgudubka Hadalka:** U adeegsiga luuqada xushmad darrada ama hanjabaada ah shaqaalaha dugsiga ama ardeyda kale waa mamnuuc.

**Hubka:**

1) Ardey kasta oo dhogta dugsiga xannaanada ama dugsi sare oo go'aansada inuu hub ku dhex qaato, ama hub ku dhex haysto, dhismayaasha dadaweynaha ee dugsiga xannaanada ama dugsiga sare, gaadiidka dadweynaha uu bixiyo dugsiga, ama aagaga xarumaha iyada oo gaar ahaan ah u adeegsanayaan dugsiyada dadweynaha, waxaa laga eryi doonaa dugsiga muddo aan ka yarayn hal sano. Kormeeraha guud ee dugsiga degmada ayaa wax kaga beddeli kara eryidda ardeyga hanaanka kiis walba u qaas ah. **RCW 28A.600.420**

2) Ardeyda haysata hub khatar ah ama wata, muujiya, ama soo bandhiga hub kasta oo khatar ah, wax hub u muuqda, boombale kaste hub u eg, ama hub kasta oo kale oo u muuqda inuu awood u leeyahay inuu waxyeelo jir geeysto, qaab, kaas oo, marka loo eego xaaladaha, muujiyaa ujeedo ah inuu cabsi geliyo qof kale ama qeylo dhaan u kicinaya amniga dadka kale waxay kasban doonaan edbin gaarsiisan oo ay ka mid tahay eryidda.

3) Haysashada waxaa ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn, ku dhex haysashada hub khatar ah dhismaha dugsiga degmada ama munaasabad ay maalgalisay degmada dugsiga:

- Meel ardeyga la siiyay sida sanduuq ama miiska; ama
- Waxa uu ardeyga leeyahay ama hantidiisa (jirka ardeyga, dharkiisa/dharkeeda, boorsadiisa dhabarka, ama baabuurkiisa); ama
- Wax ardeyga uu xakameeyo ama marin u heli karo ama uu heli karo, sida waxa uu ardeyga qariyay.

4) Hubka khatarta ah waxaa kamid ah, balse aan ku ekeen:

- Qori; ama
- Waraf, usha goloofka, toori, silsilado, ama birta faraha la gashto ah; ama
- Middi kasta oo qalab wax gooya ama dura oo loo qaato, lagu muujiyo, lagu soo bandhigo, ama lagu sawiro qaab iyo waqti iyo goob oo midkood muujinaya ujeedo ah in qof kale lagu cabsi-geliyo ama qeylo dhaan u kicinaya amniga dadka kale; ama
- Aalad kasta oo loo yaqaan "nunchucks" oo ka kooban laba ulood dhaadheer oo alwaax, bir, caag, ama shey la mid ah oo lagu xiriiriyay silig, xarig, ama qaabab kale; ama
- Aalad kasta, oo sida caadiga ah loo yaqaanno "throwing stars," kuwaas afaf badan oo fiiqan leh, bir ah oo loogu talagalay in toos u gasho qofka; ama
- Walxaha qarxa nooc walba; ama
- Wax kaste oo loo isticmaalo hub ahaan.

**Qiimaynta Khataraha**

Ujeedada Qiimaynta Khatarta ee dhismaha ku salaysan waa in la qiimeeyo khatarta qof ama koox ay ku ahaan karaan dadka kale. Hadafka habka qiimaynta khatarta waa in la qaado tallaabo ka hortag ama sixid ah oo habboon si loo ilaaliyo jawiga iskoolka oo looga dhigo mid amni leh, si loo ilaaliyo loona taageero dadka uu dhibku ku iman karo, iyo in la siiyo caawimaad qofka (dadka) la qiimaynayo hadba sida baahidu ay u jirto.

Qiimaynta Khatarta waxay dhacdaa ka dib marka la arko khatar suurtogal ah ama dhaw iyadoo loo marayo si toos ah, qaab sarbeeb ah, si qof saddexaad loo sii maraayo, dhanka baraha bulshada, qaab qoraal ah, ama falalka gardarrada ah ee waxyeelada leh.

**Qiimaynta khatartu waa:**

- Ficil Waxtar iyo taageero leh
- Hab waxqabad iyo ka hortag u leh dhaawacyada
- Hab ka shaqeeya wanaajinta jawiga iskoolka

**Sharciga 3225** iyo **Habraaca 3225P**

**Qadka Jaajuuska ee Dugsiyada Amniga leh**

**253-945-SAFE**

**Wax ma maqashay?**
**Wax ma ogtahay?**
**Wax sheeg!**

Waa dusigaafa, amnigiisa ilaali.
Wac ama fariiq qoraal ah
u dir 24 saac maalin walba.
Gasho taleefoonkaada
gacanta hadda.

## Diiwaanada Waxbarashada

Family Educational Rights and Privacy Act (FERPA) (Xeerka Xuquuqda Waxbarashada iyo Qarsoodiga ee Qoyska) wuxuu u awoodaa waalidiinta/mas'uuliyiinta iyo ardeyda ka wayn 18 sano ("ardeyda xaqa leh") xuquuqa gaar ah iyada oo loo eegayo diiwaanada waxbarasho ee ardeyda.

- Waalidiinta/mas'uuliyiinta waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan diiwaannada waxbarasho ee ardeyda. Codsiyada diiwaanada ee arday hadda dugsiga ku jiro ama waalidka/mas'uulka waa in lagu hagaajiyo maamulaha dhismaha ee dugsiga ardeyga. Iyada oo loo raacayo **RCW Cutubka 42.56**, Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxaaa laga mamnuucay sii deynta diiwaannada ardeyga ee la aqoonsan karo (marka laga reebo macluumaadka diiwaanada ee ardeyga) iyadoon fasaxa waalidka/mas'uulka uusan helin dugsiga iyo/ama shaqaalaha degmada. Diiwaanada ardeyda waxaa kamid ah, balse aan ku ekeen:
  - Fasalada
  - Natiijooyinka tijaabada waxqabadka
  - Diiwaanada soo xaadirida dugsiga
  - Diiwaanada edbinta

Diiwaanada waxbarashada waxaa ku jiri kara dhammaan macluumaadka ku saabsan ardey ee lagu soo aruuriyay laguna ilaalinayay si joogto ah, sida macluumaadka aqoonsashada sida magaca, taariikhda dhalashada, jinsiga, sanadka dugsiga, cinwaanka, nambarka taleefanka, magacyada waalidka/mas'uulka, qowmiyada, macluumaadka degdegga ah, goobta shaqada waalidka/mas'uulka, dakhtarka qoyska, daryeelaha carruurta, walaalaha, diiwaanada soo xaadirida, buundooyinka iyo warbixinnada kale ee horusocodka ardeyga, natiijooyinka imtixaannada waxtarka dugsiga, kartida, danaha, maqalka iyo aragga, warbixinnada xaaladda caafimaadka iyo tallaalka, diiwaanada waxqabadka dugsiga iyo ka qaybgalka hawlaha dugsiga, warbixinnada la xaqiijiyey anshax-xumada, oo ay kamid yihiin diiwaanka tallaabada edbinta ee la qaaday, iyo macluumaadka kale ee u sahlaya shaqaalaha inay la taliyaan ardeeyda oo ay qorsheeyaan hawlaha ku habboon.

## QORSHAHA ISTIRAATIIJIGA

### Jawi aamin ah iyo xiriir adag oo lala yeesho qoysaska iyo bulshada

**Tiirkeena labaad wuxuu aqoonsan yahay in dugsiyadda aysan kaligood sameyn karin. Sidaa daraadeed, waxaan u soo dhaweeysan doonaa waalidiinta, daryeelayaasha, iyo dhamaan bulshada Federal Way la-hawlgalayasha muhiimka ah ee waxbarashada dhamaan ardetdeena ahaan. Waxaan kobcin doonaa aaminaadda iyo is-ixtiraamka ka dhaxeeya guriga-dugsiga-bulshada iyada oo loo marayo mas'uuliyada la wadaago ee guusha ardayga, wada-xiriirka baaraandega leh, iyo codka saamileeyda oo macno leh.**



## Diiwaanada Waxbarashada *(Oo sii socda)*

### FAMILY EDUCATIONAL RIGHTS AND PRIVACY ACT (FERPA) (XEERKA XUQUUQDA WAXBARASHADA IYO QARSOODIGA EE QOYSKA)

**Waxaad wax ka oran kartaa haddii sawirada cunugaaga, magacyadiisa iyo macluumaadka kale ee diiwaanada loo adeegsado daabacaadaha boggeena intarnetka ama warbaahinta.**

Sharciga federaalka wuxuu farayaa dugsiyada inay waalidiinta ku wargeliyaan in qaar ka mid ah macluumaadka ilmahooda, ee loogu yeero "Macluumaadka Diiwaanada," loo isticmaali karo ujeeddooyin gaar ah oo la xiriira dugsiga. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waxay u sheegi karaan dugsiyada inaysan fasaxin macluumaadkan. Tani waxay qayb ka tahay sharci loo yaqaano Family Educational Rights and Privacy Act of 1974 (FERPA) (Xeerka Xuquuqda Waxbarashada iyo Qarsoodiga ee Qoyska ee 1974). FERPA wuxuu u awoodaa waalidiinta/mas'uuliyiinta iyo ardeyda ka wayn 18 sano ("ardeyda xaqa leh") xuquuqa gaar ah iyada oo loo eegayo diiwaanada waxbarasho ee ardeyda.

Waxaan ka codsaneynaa waalidiinta inay si taxadar leh uga fikiraan kahor inta ay xanibin macluumaadkan. Nasiib darro, hadii aad xaddido macluumaadka diiwaanada ee canuggaaga in lagu daro daabacaadaha dugsiga, magaca ardaygaaga iyo sawirkiisa laguma dari karo sannadleyaasha ardayda iyo buugaagta sannadlaha. Ma awoodi doonaan inay qayb ka noqdaan sawirrada fasalka, kooxda ama naadiga kuwaas oo loogu talagalay in lagu daabaco buugaagta sannadka.

Iyo, haddii aad tiraahdid "maya" in la siiyo macluumaadka xiriirka ururada dugsiga ka baxsan, magaca cunugaaga, cinwaanka iyo nambarka taleefanka lama siin doono ururada aan ahayn kuwa dagmada, oo ay kamid yihiin: shirkadaha sahayda qalin jabinta; kulleejyada; ama kuwa askarta qoranaya; iyo, ka dib markuu qalin jabiyo, guddiyada dib u mideynta dugsiga. Ku daabacida sawirrada cunugaaga daabacadaha degmada iyo boggaga intarnetka, ama warbaahinta wararka, waa mid ka mid waxyaabaha aad xakamayn karto, haddii aad rabto.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan FERPA, fadlan booqo bogga inatarnetka degmada oo ah: **www.fwps.org/departments/communications/FERPA**.

Hadaad jeceshahay inaad ka saarto canuggaaga macluumaadka diiwaanada, daabacadaha, ama sawirrada, la xiriir maamulaha xafiiska dugsigaaga.

Hellida macluumaadka way xaddidnaan kartaa haddii ardeyga uu ka qeybqaato Barnaamijka Qarsoodiga Cinwaanka ee gobolka. **Siyaasada 3231 iyo Habraaca 3231P**

## Kheyraadka Elektaroonigga ah

Guddiga agaasimayaasha iyo kormeeraha guud waxay rumeysan yihiin in dhammaan shaqaalaha iyo ardeyda ay u baahan yahiin inay noqdaan hal abuurayaal iyo adeegsadayaal macluumaad, warbaahin iyo teknolojiyad oo xirfad leh si ay guul uga gaaran dunidan casriga ah. Sidaa darteed, degmada waxay u adeegsan doontaa ilaha dijitaalka ah qaab awood iyo soo jiidasho leh oo ay ardeyda wax ku bartaan kuna adeegsadaan xirfadaha qaab ku habboon, hal abuurnimo leh oo sax ah.

Waa hadafka degmada inay siiso ardeyda fursado hodan ah oo ku filan oo ay ugu adeegsadaan teknoolojiyadda ujeeddooyin muhiim ah dugsiyada dhexdooda sida shakhsiyaadka ka shaqeeya goobaha shaqada iyo goobaha kale ee nolosha dhabta ah ay u isticmaalaan aaladahaas.

Iyadoo la kaashanayo Himilada 3, teknolojiyadda degmadu waxay awood u siineysaa dhammaan shaqaalaha degmada iyo ardayda inay xiriir sameeyaan, wax bartaan, wax wadaagaan, wada shaqeeyaan, ikhtiraacaan oo ay hal abuur sameeyaan; inay fikiraan, dhibaatooyin xaliyaan, ayna noqdaan kuwo xal loo raadinayo; inay maareeyaan shaqadooda; ayna qaataan masuuliyada noolashooda. **Siyaasada 2022 iyo Habraaca 2022P**

Iyada oo la kaashanayo sida ay nooga go'an tahay jawiga waxbarasho ee badbaadada leh, Dugsiyada Dadweeynaha Federal Way waxay hirgaliyeen aalado teknoolojiyad in si wax ku ool ah looga jawaabo walaacyada amniga ee ardayda. Iyada oo ku saleysan qaab 24/7, aaladaheena ayaa qiimeeya oo kormeera

# Kheyraadka Elektaroonigga ah *(Oo sii socda)*

waxyaabaha uu ka soo saaro ardayga akoonada iimaylka iyo shabakada ee dugsiga uu bixiyo. Waxay aqoonsataa oo ay calaamadeysaa sawirrada iyo waxyaabaha aan habooneyn ee dhalin kara walaac, iyo raadiska ereyada muhiimka ee quseeya dhacdooyinka is-wax-yeelada, rabshadaha loo geysto dadka kale, xoog u sheegashada, isticmaalka daroogada, iyo in ka badan. Waxay u sahashaa degmadda inay qaadato hab baaraandeg iyo falcelin ah si loola socdo loogana jawaabto walaacyada amniga ee ardeyda. Qalabka wuxuu ogeysiinayaa shaqaalaha loo xilsaaray inay kaga jawaabaan tallaabada ku habboon isla markaana ay ku dhisaan tallaabooyin kale ee ka shaqeenaya goob kasta oo ka mid ah goobaheena si loo hubiyo jawi waxbarasho oo badbaado leh, wax soo saar leh.

## QALABYADA CASRIGA AH

Iyda oo lagu aqoonsanayo go'aannada waalidka/mas'uulka ee la xiriira baahiyaha amniga iyo isgaarsiinta ee qoysaskooda, filashooyinka soo socda ayaa la hirgaliyaa si loo dhiso loona abuuro jawi waxbarasho oo wanaagsan wax soo saarna leh. Haysashada iyo isticmaalka qalabyada elektarooniga ama isgaarsiinta ee shakhsiyeed ama iskuulku leeyahay (sida, laakiin aan ku xaddidnayn, qalabyada xisaabinta, taleefannada, taabletyada, iPod-yada/iPad-yada, saacadaha, qalimaanta, iyo aaladaha wax lagu duubo), waa inaysan khatar ku ahayn sharafta tacliimeed, waa inaysan carqaladayn jawiga waxbarashada ama aysan ku xad gudbin xuquuqda asturnaanta ee dadka kale. Degmadu mas'uul kama aha xatooyada ama baabi'inta aaladaha dugsiga la keeno.

Macallimiinta sidoo kale waxay oggolaan karaan in lagu dhex isticmaalo aaladaha shaqsiyeed fasaladooda haddii isticmaalka noocaas ah uu gacan ka geysanayo ujeeddooyinka waxbaridda iyo/ama waxbarasho. Fadlan raac tilmaamaha dugsigaaga ee ku aadan adeegsiga aaladaha elektarooniga ah. **Siyaasada 3245**

Markii la isticmaalayo khayraadka dijitaalka ah ee degmada, ardeyda waxay aqbalaan mas'uuliyadda:

- Inay u isticmaalaan khayraadka dijitaalka ah ujeedooyin waxbarasho kaliya;
- Inay raacaan siyaasadaha degmada iyo sharciyada federaalka/gobolka, oo ay kamid yihiin sharciyada xuquuqda lahaanshaha iyo sharciyada qarsoodiga;
- Inay raacaan xeerarka iyo filashooyinka degmada ee ku saabsan isticmaalka shabakadda iyo internetka;
- Inay adeegsadaan habdhaqan wanaagsan oo muujinaaya muwaadinimada xoogan ee oonlaynka ah;
- Inay xurmeeyaan dhismaha degmada iyo adeegyada la bixiyo;
- U isticmaal agabka dhijitaalka ah qaab waxbarasho oo sharciyeeysan oo usluub iyo anshax leh;
- Inay isticmaalaan keliya macluumaadkooda gaarka ah si ay u galaan aaladdaha oo aysan la wadaagin lambar sireedyada ama qoraalada aqoonsiga adeegyada degmada;
- Inay ixtiraamaan tallaabooyinka amniga ee shaqeenaya oo ay raacaan dhammaan tilmaamaha;
- Inay kaliya diraan, marin u helaan, oo ay daabacaan qalabka ku habboon dugsiga.

Arday kasta oo si xun u isticmaala aalad kadibna uu wax soo gaaro aalada, waa la ganaaxi doonaa.

**Ardaydu waa inay keliya adeegsadaan elektaroonigyada gaarka ah (taleefannada gacanta, iPod-yada, iPad yada, iwm.) si waafaqsan tilmaamaha dugsigooda ee adeegsiga aaladaha elektarooniga ah.**

### Himiladeenna

Xafiisyada Waxbarista Barashada, iyo Adeegyada Teknolojiyada Macluumaadka waxay bixiyaan taageero lagu horumarinayo jawi ay dhamaan ardeyda fursad u yeelan doonaan inay wax ku bartaan oo ay adeegsadaan aaladaha lagama maarmaanka u ah helitaanka, falanqaynta, soosaarista, iyo daabacaadda macluumaadka si ay u taageeraan una kobciyaan khibradahooda manhajka. Waxaan si joogto ah u taageeri doonnaa ardeydeena iyo macallimiinteena inaga oo ku dheellitirayna taageerada iyo adeegyadda baahiyada iyo filashooyinka ee weligood is-beddelaya.

Doorarka qeexaya himiladeenna ayaa ka kooban shaqaalaha iyo ardeyda labadaba. Marka hore, ardeyda waxaa la siiyaa fursad ay ku sahmiyaan oo ay ugu adeegsadaan tikniyoolajiyada qaab aalad lagu taageerayo koritaanka ardeyga iyo barashada shaqsi ahaaneed. Marka labaad, si loo abuuro deegaan horseedaya adeegsiga ugu wanaagsan ee teknoolojiyadda si loo gaaro yoolalka istiraatiijiyadeed ee degmada.

Ardeyda waxaa lagu dhiirigeliyaa inay u isticmaalaan aaladaha shaqsiyeed (taleefannada gacanta, laptop-yada, iPod-yada, iPad-yada, iwm) kaliya ujeeddooyin waxbarasho iyada oo ay la socdaan hagida macallimiintooda.



**Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxaa ka go'an inay helaan jawi nabadgelyo iyo waxbarasho madani leh oo loogu talagalay dhamaan ardeyda, shaqaalaha, waalidiinta/mas'uuliyiinta, xubnayaasha qoyska, isxilqaamayaasha, daryeelayaasha, iyo martida, xorna ka ah dhibaateynta, cabsi gelin, ama xoog u sheegasho.**

**RCW 28A.300.285** *waxay ku qeexdaa dhibaataynta, cabsi gelinta ama xoog u sheegashada inay yihiin fariin kasta oo ulakac loo qoray ama sawir—ayna kujiraan kuwa khadka interneetka la iskudhaafsado—hadal, ama talaabo gacan qaad ah, ooyna kujiraan laakiin aan kukoobnayn mid u muuqda inuu salka kuhayo isir, midab, diinta, asalka qofka, wadanka u qofku udhashay, jinsi, dookha galmo ee qofka ayna kujiraan muujinta ama aqoonsiga jinsiga qofka, ama naafada jirka ama dhimirka, ama qaybha kale ee sifooyinka, marka fariinta kaska loo qoray, lagu hadlay, marka ficilka:*

- Jir ahaan waxyeelo u geysaneysaa ardayga ama waxyeeleyso hantida arday;
- Waxay leedahay saameynta faragalinta waxbarashada ee arday;
- Aad u daran, u dulqaadasho badan ama baahsan oo abuuraya jawi cabsi gelin ama cabsi gelin;
- Waxay leedahay saameyn si weyn u carqaladeynaysa hawlgallada nidaamsan ee dugsiga.

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way ahaan, waxaan ku hawlanahay inaan dammaanad qaad in arday kasta uu ogyahay, fahamsan yahay, oo uu oggalaado dhaqankooda iyo baahida waxbarashada u gaarka ah iyo mida kale, si ay ugu doodaan naftooda iyo dadka kaleba.

# Dhibaataynta, Cabsi gelinta ama Xoog U Sheegasho (HIB)

## Soo Wargelinta

Ardayda la kulma kadeedis, cabsi gelin, ama xoogsheegasho waa inay u soo sheegaan wixii isla markiiba ku dhacay qof qaan gaar ah oo dugsiga jooga, ama waalidkood oo markaa arrinta uga warbixin kara maamulka goobta. Ka eeg bogga 26-aad macluumaadka xiriirka dugsiga.

## Baaritaan

Soo wargelinta ayaa bilaabi doonta baaritaan waalidka/mas'uulkana waxaa la ogeysiin doonaa natiijooyinka baaritaanka. Dugsiga wuxuu la shaqeyn doonaa waalidka/mas'uulka si loo go'aamiyo talaabooyinka xigga ee wax lagaga qaban lahaa arrimaha. Haddii ardeyga/waalidka/mas'uulka ay diido natiijooyinka baaritaanka, ardeyga/waalidka/mas'uulka ayaa rafcaan ka qaadan kara go'aanka. Kala xiriir Xafiiska Sinaanta Ardeyda iyo Guusha Qoyska lambarka 253-945-2000 si aad u codsato racfaan. Macluumaadka waxaa lagu bixiyaa luqado kala duwan: **https://www.fwps.org/hib**.

## Dhibaataynta Takoorka Leh

Siyaasadda iyo Habraaca Degmada 3207/P ee ku saabsan Dhibaateynta, Cabsi-gelinta, iyo Xoogsheegashada waxay u shaqeysaa si waafaqsan siyaasadaha kale ee Degmada, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidnayn Siyaasadda iyo Habraaca 3210/P ee ku saabsan Takoor la'aanta. Haddii ardayda ama waalidiinta/masuuliyiintu aaminsan yihiin in dhibaataynta ku salaysan takoorku ay dhacday, waxaa lagu boorinayaa inay u gudbiyaan dhibaatayntaas maamulka xarunta oo kaa caawin kara inaad gudbiso cabasho ku saabsan dhibaataynta adoo raacaaya xeerka iyo habraaca u degsan. Si aad u hesho nuqulka siyaasada iyo habraaca takoor la'aanta ee degmada, la xiriir dugsigaaga ama xafiiska degmada ama ka eeg intarnetka halkan:

https://resources.finalsite.net/images/v1690949346/fwpsorg/aashrqzxabh0nafgykmh/3210_Adopted_041216.pdf

https://resources.finalsite.net/images/v1685012562/fwpsorg/mnpwgeacrczafkb06ktm/3210P-Approved-072519.pdf

https://resources.finalsite.net/images/v1685012302/fwpsorg/wgb6nbna2yi8hkqruhbu/3207-Approved-82421_1.pdf

## Dhibaateynta Galmada

Degmada waxay u heellantahay waxbarasho hufan oo wax soo saar leh, kana madax bannaan takoorista, ay kamid tahay dgibaateynta galmada. Dhibaateynta Galmada waa dhaqan ama xiriir aan la jecleysan oo dabiici ahaan galmo ku saleysan waxayna (1) horseedaa ardeyga inuu aamino inay qasab tahay inuu isku dhiibo dhaqanka ama xiriirka aan la jecleysan si badelkeeda wax ugu helaan—tusaale ahaan, darajo ama boos uga helo kooxda isboortiga, ***ama*** (2) dhaqanka wuxuu si weyn u faragelinayaa natiijada waxbarashada ee ardeyga ama wuxuu abuurayaa jawi cadaawad leh. Ardey ama shaqaale dugsi kasta ayaa bartilmaameed u noqon kara dhibaateynta galmada, iyadoon loo eegayn jinsiga, dookha galmo ee qofka, aqoonsiga jinsiga, ama muujinta jinsiga. Degmada waxay mamnuucday dhibaateynta galmada ee ardeyda ay u geystaan ardeyda kale, shaqaalaha ama qeybaha seddexaad ee ku lug leh howlaha degmada dugsiga sida barnaamijyada tacliinta, waxbarashada, hawlaha manhajka ka baxsan, ciyaaraha fudud, iyo barnaamijyada ama howlaha ee dugsiga, hadii barnaamijka ama hawsha ay ka jirto xarunta dugsiga, gaadiidka dugsiga ama fasal ama tababar lagu qabto meel kale.

Tusaalayaasha dhibaateynta galmada waxaa kamid ah:

- In loo cadaadiyo qof rabitaan galmo awgeed;
- Taataabashada aan la jecleysan ee asal ahaan galmo ku saleysan;
- Qaybinta qoraallada, iimaylada ama sawirrada muujiya galmada;
- Xadgudubka jireed, oo ay kujiraan kufsi iyo faraxumaynta galmada.

Cabashada Xad-gudubka Galmada waa in isla markaaba lagu wargeliyaa Isku-Duwaha Hoggaaminta Ciwaanka IX ee Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way 253-945-2000 ama titleix@fwps.org.

**Siyaasada 3205 iyo Habraaca 3205P**
**Siyaasada 3207 iyo Habraaca 3207P**

## Maandooriyaha Waxyeellada leh

Dhammaan ardeyda waxay wadaagaan mas'uuliyada ah inay ilaaliyaan jawi waxbarasho oo wax ku ool ah. Isticmaalka ardeyda ee khamrada, maandooriyaha, iyo walxaha maskaxda beddela ee tubaakada ku jira (oo ay kamid yihiin sigaarka elektiroonigga ama uumiga) kaliya ma ahan sharci-darro, balse sidoo kale waxay caqabad ku tahay waxbarashadooda waxayna dhaawac ku tahay caafimaadkooda. Taakuleynta ardeyga ee ugu wanaagsan waxay ku bilaabataa qoyska oo ka taageera ardeyga inuu yeesho maskaxda iyo jir maan-dooriyaha ka fiyoow. Intaa waxaa sii dheer, la taliyaha dugsiga/adeegaha bulshada ee dugsi walba wuxuu bixiyaa macluumaad dheeraad ah oo lagala xiriirayo wakaaladaha caafimaadka ee daroogada iyo khamriga. Dhamaan shaqaalaha waxay mas'uul ka yihiin inay dhaqangeliyaan siyaasadan. Maamulka dugsiga iyo shaqaalaha (kalkaalisada, amniga, iyo/ama la taliyaha/adeegaha bulshada) iyo waalidka/mas'uulka (iinta) ardeyga ayaa ka wada tashan doona nidaamyada taageero ee suuragalka ah haddii la helo in ardeyga uu isticmaalo maandooriye. **Siyaasada 3248**

Haysashada ama isticmaalka ardeyda ee waxyaabaha ka sameysan tubaakada (oo ay ku jiraan sigaarka elektiroonigga ah iyo qalabka sigaarka uumiga), khamrada, maandooriyayaasha ama waxyaabaha maanka dooriya ee dhismaha dugsiga dhexdiisa ama hawlaha uu maalgelo dugsiga waa mamnuuc.

Shuruudaha dheeriga ah ee saameynta ku leh ka qeybgalka ardayda ee ciyaaraha fudud iyo/ama hawlaha ayaa is-biirsada fasalada 7-aad ilaa iyo 12-aad waxaana laga heli karaa Filashooyinka Anshaxa Hawlaha/Ciyaaraha Fudud. Ardeyda ku xadgudubta shuruudaha laxiriira jawiga waxbarashada ee ka madaxbanaan daroogada waxaa lagu qaadi doonaa edbin sida ku qeexan **Siyaasada 3240–Anshax Ardeyga**, iyo **Siyaasada 3241–Edbinta iyo Edbinta Anshax Xumada**.

- Ardey ma yeelan doono, ma isticmaali doono, ma iibin doono, ma qaybin doono, iskuma dayi doono inuu qaybiyo, ma yeelan karo saameynta, ama ma muujin karo caddeynta ah, inuu isticmaalay wax khamri ah, maandooriye sharci darro ah ama walxaha la xukumay ama shay loo aqoonsaday inuu yahay daroogo sharci darro ah ama shay la xakameynayo ama daroogada keenta muuqaal dhalanteedka. **Habraaca 3241P**
- Dhammaan waxyaabaha ka sameysan tubaakada iyo qalabyada, oo ay kamid yihiin sigaarka elektiroonigga ah iyo qalabka sigaarka uumiga, ayaa lagula wareegi doonaa oo lagu qubi doonaa qaab ku habboon. Waalidka/mas'uulka inuu kalan la yeesho maamulka dugsiga ayaa loo baahan yahay.
- Adeegyada Ilaalinta Ilmaha (CPS) ayaa lala xiriiri doonaa haddii waalidiinta ama mas'uuliyiinta aysan raacin talooyinka. Macallimiinta, la-taliyayaasha, maamulayaasha, shaqaalaha xarunta daryeelka ilmaha, iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka ee dugsiga wuxuu farayaa sharciga gobolka inay soo wargeliyaan CPS kiisaska la tuhunsan yahay ee xadgudubka ama dayaca carruurta.



## QORSHAHA ISTIRAATIIJIGA

2 *Ilmaha oo dhan:*

**SHAKHSIYAAD KOBCAYA, KALSOONI LEH, MASUULLIYAD LEH**

Arday kasta waa la xoojin doonaa oo loo diyaarin doonaa si ay u horumariyaan masuuliyadda shakhsi ahaaneed si ay u noqon kuwa fiican, xubnaha wax soo saar leh ee bulshada.

### Waxbarid iyo Barashada Heerarka-ku Xiran ee Ka Jawaabcelisa Dhaqanka

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxaa ka go'an sameynta taageerooyin badan oo gudaha dugsiga ah iyo in iskaashi lala yeesho ururada ku saleysan bulshada.

Dugsi kasta wuxuu bixiyaa la taliyayaal iyo/ama shaqaale bulsho oo ku saleysan dugsiga kuwaas oo diyaar u ah inay ka taageeraan ardeyda iyo qoysaska sidii loogu xiri lahaa nidaamyada taageerada. Si toos ah ula xiriir dugsiga cunugaaga (carruurtaada) si aad u hesho la-taliyaha dugsiga/adeegaha bulshada, xiriiriyaha qoyska, iyo/ama taageerada bulshada/shucuurta ee ku saleysan bulshada.

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxaa ka go'an inay iskaashi la yeeshaan ururada ku saleysan bulshada si loo bixiyo adeegyada bulshada, shucuurta, iyo caafimaad muhiimka ah ee lagama maarmaanka u ah sidii loo taageeri lahaa ardeyda si ay u doortaan nolol caafimaad leh. Ururada bulshada badankood ayaa kugu caawin kara macluumaad dheeraad ah si loo taageero qoysaska qaba dhibaato dhaqaale.

## Maandooriyaha Waxyeellada leh *(Oo sii socda)*



**CABBIRADA HORUSOCODKA**

Waxaa jirta xog uruurin lagu cabiro horusocodka laga sameeyay qorshaha istiraatiijiyadeed ee Hadafka Labaad: Boqolkiiba ardayda dareemaan in uu dugsigooda ammaan yahay oo soo dhoweyn leeyahay sida lagu cabbiray xog uruurin aragtida ah.

| | | |
|---|---|---|
| **Fasalada PreK–4** | **Haysashada, wadaagga /isweydaarsiga, isticmaalka** | • Walxaha (maandooriyayaasha) iyo qalabka ayaa lagula wareegi doonaa oo lagu qubi doonaa qaab ku habboon.<br>• Kulanka waalidka/mas'uulka ayaa loo baahan yahay.<br>• Hay'adda fulinta sharciga iyo taageerada caafimaadka ayaa lala xiriiri karaa. |
| **Fasalada 5–12** | **Haysashada, wadaagga /isweydaarsiga, isticmaalka** | • Kulanka waalidka/mas'uulka ayaa loo baahan yahay.<br>• Sarkaalka Badbaadada iyo/ama Sarkaalka Kheyraadka Dugsiga (SRO) iyo taageerada caafimaadka ayaa lala xiriiri karaa. |
| **Fasalada 5–12** | **Dembiga koowaad ee iibinta iyo/ama geeynta** | • Ardayga waxaa laga yaabaa in muddo dheer laga joojiyo degmada.<br>• Kulanka waalidka/mas'uulka ayaa loo baahan yahay.<br>• Hay'adda fulinta sharciga ayaa lala xiriiri doonaa. |

## Macluumaadka Caafimaadka

### CUDURKA COVID-19

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxaa ka go'an inay raacaan tallooyinka Caafimaadka Fayodhowrka ee ardeyda, shaqaalaha, iyo qoysaska si loo yareeyo faafitaanka cudurka COVID-19.

Waxaan ku dhiirigelin doonnaa aqoonyahannada inay si joogta ah u dhaqdaan gacmahooda iyo/ama isticmaalaan gacmo nadiifiyaha. Waxaanu raaci doonnaa tilmaamaha loo baahan yahay ee ay daabacday oo ay na soo gaadhsiisay Waaxda Caafimaadka Dadweynaha.

Degmada waxay rabtaa inay xasuusiso waalidka/mas'uuliyiinta waajibaadkooda ah inay caruurtooda guriga ku hayaan markay jiran yihiin ama ay yeeshaan wax calaamado qandho ah; inay lambarada xiriirka xaaladaha degdega ah ee u danbeeyay heystaan; inay qorsheystaan inay ardeyda isla markaaba ka soo qaaddaan dugsiga, haddii ay jiran yihiin.

Degmada waxay sii wadi doontaa inay cusbooneysiiso oo ay soo gudbiso tallooyinka caafimaadka iyada oo la waafaqayo Waaxda Caafimaadka iyo CDC markii loo baahdo.

### DAAWEYNTA DUGSIGA

Sharciga gobolka Washington ayaa u oggolaanaya shaqaalaha dugsiga inay ku bixiyaan daawo xaalado xaddidan oo keliya. Daawo waxaa lagu macneeyaa inay ka dhigan tahay dhammaan daawooyinka, ha ahaato kuwa dhakhtarka qoro ama dukaanka laga iibsado. **Siyaasada 3416**

Kahor siinta dawooyinka rijeetada ama kuwa dukaanka laga soo iibsado (OTC), shuruudaha soosocda waa in la buuxiyaa:

- Oggolaanshaha qoran ee waalidka/mas'uulka sharciga ah waa inuu feyl gareysnaado isaga oo sheegaya magaca daawada, kuuraha, waqtiga, taariikhaha la bixin doono, magaca ardeyga, saxiixa waalidka/mas'uulka, taariikhda.
- Dalabyada daawada waxaa laga aqbali karaa bixiye xannaano caafimaad kasta oo leh awood uu dawooyinka uu ku qoro. Dalabka waa inuu sidoo kale muujiyaa magaca daawada, kuuraha, waqtiga, iyo taarikhaha la bixin doono oo ay kujirto saxiixa bixiyaha xannaanada caafimaadka. Dalabyada fakiska lagu soo diro waa la aqbalaa. Dalabyada waxay shaqeynayaan muddo aan ka badnayn sannad dugsiyeedka hadda lagu jiro.
- Daawooyinka oo dhan waa inay ku jiraan weelka lagu keenay ee calaamadeysan oo lagu calaamadeeyay magaca ardeyga. Wax badan sahay 30-maalmood ku filan ma aqbali doono dugsiga.
- Daawooyinka waa in uu iskoolka keenaa qof weyn oo mas'uul ah. Dhammaan daawooyinka la qorsheeyay sida kuwa ADHD ee la xakameeyo, daawooyinka qalalka ee degdegga ah, iwm. waa in ay saxiixaan qofka weyn ee mas'uulka ah iyo shaqaale iskool oo loo xilsaaray arrinkaas ka hor inta iskoolku aanu aqbalin daawada.

Ma jiro ardey siin karo, bixin karo, ama maareyn karo daawooyin ama xal ardey kale.

Ma jiri doonto daawo lagu bixin doono cirbad duris marka laga reebo marka ardeyga uu halis u yahay xaalad hore loo go'aansaday, khatar gelinaysa nolosha.

Xaaladda daawada qofka iskiis u qaato, waalidka ayaa soo gudbin doonaa foomka oggolaanshaha/fasaxa oo sixiixan. Oggolaanshaha noocaas ah waxaa taageeri doono dalabyo qoraal ah oo saxeexan oo taariikhi leh oo ay weheliso qorshe daaweyn oo ka yimid xirfadle xannaano caafimaad oo sharciyeysan.

# Macluumaadka Caafimaadka *(Oo sii socda)*

Daawooyinka la xiriira sonkorowga waxaa si gaar ah looga hadlaa **Siyaasada 3415**.

Ardayda ku jirta dugsiga barbaarinta ilaa fasalka 5-aad ma lahaan doonaan dawooyinka dukaanka laga soo iibsado ama kuwa dhakhtarka qoro ama daawooyinka/xalalka ee yaala dhismaha dugsiga ilaa laga helo caddeyn qoraal ah maamulaha iyo kalkaaliyaha caafimaad ee dugsiga.

Ardayda ku jirta fasaladaa 6-aad ilaa iyo 12-aad ma lahaan doonaan dawooyinka dukaanka laga soo iibsado ama kuwa dhakhtarka qoro ama daawooyinka/xalalka ee yaala dhismaha dugsiga marka laga reebo marka fasax qoraal ah lala kaashado kalkaaliyaha caafimaad ee dugsiga.

## Daawada Dhakhtarka Uu Qoro

Marka ay yimaadaan xaaladaha ay waalidka/masuulka, maamulaha iyo kalkaalisada iskoolku aaminsan yihiin in danta ugu wanaagsan ay ku jirto in aqoonyahanku uu wato dawada dhakhtarku qoray, waa in uu ardaygu sitaa nuqulka ogolaanshaha qoran ee waalidka/masuulka iyo dhakhtarka ka socda, kaas oo muujinaaya magaca iyo qiyaasta daawada, iyo taariikhaha iyo wakhtiga la qaadanaayo. Kaliya qiyaasta hal maalin (oo ku jirta weel asal ahaan calaamadeysan) ayuu sidan karaa aqoonyahanka (qalabka neefsashada ayaa laga yaabaa in laga dhaafo shardigan).

Oggolaanshana ma gaarsiisano walxaha la xakameeyo. Foomka oggalaanshaha ee asalka ah wuxuu ku jiri doonaa feylka Qolka Caafimaadka.

## Daawada Dhakhtarka Uusan Qorin

Daawooyinka dhakhtarka uusan qorin ee ardeyda fasalka PreK–5-aad waa inay raacaan dhammaan habraacyada lagu qaato daawooyinka ee dugsiga oo ay kamid yihiin awaamiirta dhakhtarka oo qoran, ogolaanshaha waalidka oo qoran, iyo weelka lagu keenay ee calaamadeeysan oo uu keenay dugsiga waalidka/mas'uulka.

Ardayda ku jirta fasalada 6-aad ilaa iyo12-aad waxay heysan karaan dawooyinka dukaanka laga soo iibsado (dhakhtarka uusan qorin) ama daawooyinka/xalalka ee yaala dhismayaasha dugsiga iyaga oo raacaya shuruudahan soo socda:

- Ardaygu waa inuu ogolaansho qoran kasoo qaataa waalidka/masuulka kaasoo sheegaaya nooca daawada qandho jebinta iyo kuurada daawada ardaygu qaadan karo. Nuqulka foomka waa in lagu hayaa galka caafimaadka ardayga lagalana hadlo kalkaalisada dugsiga kahor inta uusan qaadan daawada.
- Ardaygu waa inuu sitaa keliya kuurada maalintaas dugsiga, oo ku jirta qasaceedii rasmiga ah.

Ardaugu uma baahna inuu yimaado qolka caafimaadka si uu u liqo daawada wuxuuna cuni karaa markuu rabo, laakiin waa inuu keenaa cadeynta ogolaanshaha waalidka marka la waydiisto.

## Ka Hortagga Ismiidaaminta/Isdal-dalaada

Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way waxay aqoonsan yihiin in ismiidaamintu/isdal-dalaadu ay tahay sababta ugu weyn ee keenta dhimashada dhalinyarada iyo in tilmaamayaasha isdilaadda sida daroogada iyo rabshadaha ay yihiin arrimo adag oo ay tahay in si dhab ah loo qaato. In kasta oo shaqaalaha degmadu aqoonsan karaan dhallinyarada is-dili karta, degmadu ma bixin karto la-talinta caafimaadka dhimirkaoo qoto-dheer. Taa baddalkeeda, Degmadu waxay ku amraysaa shaqaalaha inay ardayda soo bandhiga dabeecadaha isdilka u gudbiyaan adeeg u habboon si loogu sameeyo qiimeyn iyo la-talin dheeri ah.

Shaqaalaha degmada ee wax ka ogaada hanjabaad ismiidaamin/isdal-dalaad ah waa inay qaadaan tallaabooyinka saxda ah ee lagu caawinayo ardayga iyo inay ku soo wargeliyaan macluumaadkan maamulaha dhismaha ama qofka loo xilsaaray kaas oo, sidoo kale, la soo socodsiin doona saraakiisha dugsiga ee ku habboon, qoyska ardayga, adeegyada kheyraadka habboon, iyo waaxda sharci fulinta.

Degmadu waxay sidoo kale aqoonsan tahay baahida loo qabo habraacyda ka hortagga ismiidaaminta/isdal-dalaada dhallinyarada. Degmadu waxay dhaqan gelin doontaa oo, bilowga sanad dugsiyeed kasta, ay siin doontaa dhammaan shaqaalaha degmada, oo ay ku jiraan darawaalada basaska ee beddelka ah iyo kuwa joogtada ah, qorshe lagu aqoonsado, lagu baaro, loogu tixraaco, loogana jawaabo ardayda ldhibaataysan shucuur ahaan ama dabeecad ahaan.

Degmadu waxay ku dhiirrigelin doontaa ardayda inay ogeysiiyaan macallin, maamule, la-taliye, ama qof kale oo qaan-gaar ah markay la kulmaan niyad-jab ama fikrado is-dilid ah ama markay ka shakiyaan ama ay ogaadaan arday kale oo iska quustay ama ujeeddooyin is-dilaad ah qaba. Meesha ku habboon ttahay, Degmadu waxay ardayda u isticmaali doontaa inay ka caawiyaan waxbaridda kuwa aasaagooda ah inay aqoonsadaan astaamaha digniinta ah ee isdilaadda iyo helitaanka caawimaadda ardayda laga yaabo inay isdal-dalaan.

**Ma jiro ardey siin karo, bixin karo, ama maareyn karo daawooyin ama xal ardey kale.**

*Markey imaado xaalad degdegga ah, shaqaalaha caafimaadka (911) iyo waalidka/mas'uulka ayaa lala soo xiriiri doonaa. Fadlan hubso in macluumaadkaaga xiriirka ee markaas had iyo jeer uu cusbooneysiisan yahay.*

**Cusboonaysii Xulashooyinkaada Macluumaadka iyo Ogeysiiska**

Waalidiinta, waxaan u baahan nahay kaalmadiina si aan u hubinno in nidaamyadeenna isgaarsiinta ay u shaqeeyaan sida ay ahayd inay u shaqeeyaan iyagoo bixinaya macluumaad xiriir oo dhammaystiran oo kii u danbeeyay ah. Xaqiiqdii, waxaad bixin kartaa lambar koowaad iyo sidoo kale lambar labaad, lambarrada taleefanka gacanta, lambarka fariimaha qoraalka, iyo cinwaanka e-maylka ilaa afar waalid ama mas'uul. Kaliya waalidiinta ardayda mas'uulka ka ah ayaa codsan kara wax bedelka, waxaana loo baahan yahay lambarka aqoonsiga ardayga si loo xaqiijiyo.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo habeeyo dookhyadaada ogeysiiska, booqo **www.fwps.org/ParentSquare**.

Wixii ku saabsan Caawinta dhanka ParentSquare, kala xiriir iskoolka ilmahaaga ama xafiiska Waaxda Isgaarsiinta 253-945-2264.

# Wargelinta Qoysaska

## ParentSquare

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxay adeegsadaan nidaamka fariimaha mideysan ee Parent Square si loola xiriiro qoysaska ardeydeena e-mayl ahaan,fariin qoraal iyo cod ahaan oo lagala hadlo xaaladaha degdegga ah, howlaha, iyo wararka kale ee dugsiga iyo degmada. Shaqaalaha dugsiga, sida maamuleyaasha iyo macalimiinta, ayaa sidoo kale u adeegsan kara aaladaan si ay ugula xiriiraan waalidiinta iimeelka, fariin qoraal, iyo abka.

Waxaan qirsannahay muhimadda ay leedahay in qoysaska la wargeliyo. Hadafkeennu waa:

- Inaan si dhakhso ah oo sax ah ugu wargalinno qoysaska iyo shaqaalaha dugsiga baaqashooyinka ay ugu wacan tahay cimilada ama adeegyada oo xumaaday;
- Inaan si dhakhso ah oo sax ah ugu wargalinno qoysaska ka maqnaanshaha cunugooda dugsiga maalin walbo;
- Inaan si dhakhso ah oo sax ah ugu wargalinno qoysaska iyo shaqaalaha xaalad kasta oo degdeg ah sida gurya ku nagaanshaha ama u daadguraynta degdegga ay ugu wacan tahay kala taga waqtiga hore ee cimilada la xiriiraa; iyo
- Inaan xoojino isgaarsiinta ka dhexaysa bulshada dugsiga dhexdeeda qoysaska, maamulayaasha iyo shaqaalaha.

Nidaamka ayaa sidoo kale loo isticmaalaa si loogu gaarsiiyo qoysaska ogeysiisyo ku saabsan munaasabadaha soo socda sida xasuusinnada, hawlaha dugsiga, baaritaanka, iyo macluumaadka la xiriira soo xaadirida ama buundooyinka ardeygooda.



Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, sida ku dhex xirida dugsiga cunugaaga ama baajinta dugsiga daqiiqadaha ugu dambeeya ay ugu wacan tahay cimilada ama adeeg xumaada, waxaan wacnaa lambarka waxaanna u dirnaa iimeel si aan u hubinno in waalidiinta iyo mas'uuliyiinta la wargaliyo sida ugu dhakhsada badan.

## StudentSquare

StudentSquare waa agab isgaarsiineed oo isticmaalkiisu sahlan yahay oo amaan ah oo loogu talagalay aqoonyahannada dugsiga sare ee gudaha barnaamijka ParentSquare. StudentSquare wuxuu u ogolaanayaa macalimiinta iyo shaqaalaha iskoolku inay si toos ah oo amaan ah oo sugan ay ula xidhiidhaan ardayda fasalada 9-12, iyo ardaydaas inay si toos ah ula xidhiidhaan macalimiintooda.

Arday kasta oo FWPS dhigta oo ku jira fasallada 9-12 ayaa si toos ah akoon ugu leh StudentSquare iyada oo loo marayo akoonkooda iimaylka Google ee degmadu bixiso account@p12fwps.org. Ardaydu waxay farriimaha ku heli doonaan iimaylka, waxayna sidoo kale soo dejisan karaan abka StudentSquare (iOS iyo Android) si ay toos ugu helaan ogeysiisyada taleefankooda. Ardaydu waxay awoodaan inay:

- Si toos ah fariimaha uga helaan iskoolka oo ku soo dhacaaya iimaylka ama abka moobeylka.
- U diraan fariimaha macalimiinta ama shaqaalaha iskoolkooda.
- Ku xidhnaadaan hawlaha manhajka tacliinta ka baxsan ee naadiyada iyo ciyaaraha ee isticmaala kooxaha StudentSquare si ay u wada xidhiidhaan.
- Iska diiwaan geliyaan jadwallada taarikhda, ka jawaab-celiyaan casuumaada dhacdooyinka, oo isticmaalaan waraaqoyinka isdiiwaangelinta.

## Ogeysiiska Sanadlaha ah

Sanad walba, degmada waxay ku daabacdaa onleenka daabacaada Ogeysiiska Sannadlaha ah kaas oo bixiya ogeysiisyo uu faro sharciga gobolka iyo federaalka, iyo macluumaad kale waxtarka leh ee ku saabsan mowduucyo kala duwan sida macluumaadka la xiriira caafimaadka, ChildFind, qoraalka shaqaaleynta, iyo inbadan. Ogeysiisyadan waxaa laga helaa bogga intarnetka degmada oo ah: **www.fwps.org/AnnualNotification**.

# Siyaasada Takoor La'aanta

Degmadu si sharci darro ah uma takoori doonto arday takoorkaas oo ku saleysan jinsi, jinsiyad, caqiido, diin, midab, asal qaran, aqoonsiga galmada, muujinta jinsiga, aqoonsiga jinsiga, naafonimo, ama isticmaalka ey hageah oo tababaran ama xayawaan adeege ah. Degmada waxay siisaa helitaan simman ee Boy Scouts of America iyo kooxyada dhalinyarada kale ee loogu talagalay. Isgaarsiin kasta, qoraal ama hadal ah, waxaa lagu bixin doonaa luqad uu Cabasho Qabaha fahmi karo ama u baahan caawimaad xagga luqadda ah taas oo loogu talagalay Dadka Cabanaya ee aqoonta xaddidan u leh Ingiriisiga sida ku cad Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ee 1964.

Haddii aad qabtid su'aalo ama cabashooyin la xiriirto takoor la soo eedeeyay fadlan kala xiriir xafiiska degmada 33330 8th Avenue South, Federal Way, WA 98003 oo weeydi mid ka mid ah isku duwayaasha soo socda ee dhinaca midig ku qoran.

## Sida Loo Gudbiyo Dacwada Takoorka

Qof kasta ayaa ka xareyn karo cabasho ku andacooneysa midabtakoorka dugsiga dadweynaha Washington iyada oo ku saleysan dabaq la ilaaliyo. Tani waxaa kamid ah waalidiinta, ardayda, macallimiinta, maamulayaasha, iyo u doodayaasha. U raac habraaca cabashada si dhaw. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad u baahan tahay macluumaad, kala xiriir Khayraadka Dadweynaha 253-945-2000.

- Dacwada u gudbinta degmada dugsiga **WAC 392-190-065**
- Racfaan ka qaadashada guddiga dugsiga **WAC 392-190-070**
- Dacwada OSPI **WAC 392-190-075**

**1. Ku soo dir cabashadaada qoraalka** Kheyraadka Aadanaha boostada, fakiska, iimaylka ama gacan ku bixin.

**2. Demada dugsiga waxey baareysaa dacwadaada.** Sarkaalkaaga u hogaansanaanta xuquuqda madaniga wuxuu leeyahay door muhiim ah inuu ka ciyaaro marka degmada iskuulka ay hesho codsigaaga qoraalka ah. Isku duwaha ayaa:

- Ku siiyaa nuqulka habraaca loo raacayo dacwooyinka takoorka.
- Hubsado in baaritaan si degdeg ah oo buuxa la sameeyo.

**Muhiim:**

- Halkan marki la joogo, waxaad go'aansan kartaa inaad xalliso dacwadaada isla markaaba halkii aad ka sii wadi lahayd baaritaanka. Degmada waxay haysataa 30 maalmood inay kaga jawaabaan dacwadaada ilaa aad ku heshiisaan waqti ka duwan mooyee.
- Haddii dacwadaada ay ku lug leedahay xaalado gaar ah oo u baahan baaritaan dheeri ah, degmada waa inay qoraal ahaan kugu soo wargelisaa (1) sababta shaqaalaha ay ugu baahan yihiin waqti kordhintan iyo (2), taariikhda cusub ee jawaab celintooda qoraalka ah.

**3. Demada dugsiga waxey ka soo jawaabeysaa dacwadaada.** Waa jawaab qoraal ah, degmada waa inay ku dartaa macluumaadkan:

- Soo koobida natiijooyinka baaritaanka;
- Go'aamin si cad u sheegaysa hadii ay degmada ama dugsiga jaartarka ku guuldareystay inay u hoggaansamaan sharciga xuquuqda madaniga;
- Ogeysiis inaad racfaan ka qaadan karto go'aankan: sida iyo meesha laga xareysto rafcaanka, iyo cida ay tahay in lagu aadiyo;
- Tallaabooyin kasta, oo lagu go'aamiyay baaritaanka, muhiim na u ah in degmada la waafajiyo u hoggaansanaanta sharciga xuquuqda madaniga.

**Muhiim:** Tallaabooyin kasta oo sixid ah oo lagama maarmaan ah ayaa la dhaqan gelin doonaa 30 maalmood gudahood ka dib jawaabtan qoran, ilaa aad ogolaato wakhti ka duwan mooyaane.

**Racfaan**

Haddii aadan oggalaanin go'aanka ka dambeeya baaritaanka degmada ee dacwadaada, waxaad xereysan kartaa racfaan. Macluumaadka ku saabsan hannaanka racfaanka waa in lagu soo daro jawaabaha qoraalka ah ee aad heshid marka degmada ay dhammayso baaritaankeeda.

**Xor Ka Ahaanshaha Faragelinta Waxbarashada**

Dhammaan ardeyda waxay xaq u leeyihiin inay xor ka ahaadaan faragalin sharci darro ah markay raadinayaan waxbarasho inta ay dhiganayaan dugsiyada dadweynaha.

*Qof walba oo leh eedeyn takoor wuxuu codsan karaa inuu la yeesho kulan aan rasmi ahayn Sarkaalka U Hogaansanaanta ama shaqaalaha loo xilsaaray si ay xaliyaan walaacyadooda.*

*Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqaha madaniga waxaa laga heli karaa Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqaha Madaniga iyadoo loo marayo Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbaridda Dadweynaha ee barta internetka k12.wa.us/equity/.*

| Iskuduwaha U Hogaansamida Xuquuqda Madaniga |
|---|
| 253-945-2000<br>compliance@fwps.org |
| **Iskuduwaha Title IX (Farqada IX)** |
| 253-945-2000<br>titleix@fwps.org |
| **Iskuduwaha U Hogaansamida 504/ADA** |
| Toni Cheever<br>253-945-2000<br>504@fwps.org |

## Su'alalaha iyo Jawaabaha Ardeyga

**S (Su'aal): Sideen ku ogaan karaa waxa aan sameyn lahaa?**

**J** (Jawaab): Macallinkaaga ayaa kuu sharixi doona dhammaan tillaabooyinka Scholar-Led Conferences (Shirka Uu Hogaamiyo Ardayda) wuxuuna kaa caawin doonaa inaad isu diyaariso. Waxaad fursad u heli doontaa inaad ku tababbarato fasalkaaga ka hor shirka dhabta ah.

**S (Su'aal): Sidee buu kulankeyga u muuqan doonaa una dhawaaqi ekaan?**

**J** (Jawaab): Waxaad awood u yeelan doontaa inaad la wadaagto waxaad ku baratay dugsiga iyo wixii aad ugu faanto qoyskaaga.

# Scholar-Led Conferences (Shirka Uu Hogaamiyo Ardayda)

Shirka Uu Hogaamiyo Ardayda wuxuu iftiiminayaa qofka ugu muhiimsan hannaanka: ardeyga. Waxay wanaajiyaan isdhexgalka waalidka/mas'uulka, waxayna gaarsiiyaan ardeyda heer ay weydiiyaan macallimiintooda, "Sidee Ayaan Shaqadeyda Ku Wanaajin Karaa?" Shirka Uu Hogaamiyo Ardayda wuxuu mas'uuliyda saaraa ardeyda, iyaga oo mas'uul ka ah isla markaana lala xisaabtamayo markii ay u bandhigaan shaqadooda waalidka/mas'uulka. Shirka noocan ahi waa horumar dabiici ah oo lagu doonayo in lagu diyaariyo ardeyda si ay ugu najaxaan bulshada adduunka.

### Ujeedka Shirka Uu Hogaamiyo Ardayda

Ujeeddada Shirka Hogaaminaya Ardayga ayaa ah in ardayga la siiyo fursad uu qoyskiisa kula wadaago waxa ay ardayda ka baranayaan iskuulka. Ardayga wuxuu la wadaagi karaa yoolalka waxbarashadda iyo qaybo ka mid ah shaqadooda ee ka dhigaya ardayga inay ku fanaanaan waxqabadkooda. Qayb kastaa waxay ka dhigan tahay shaqo dhab ah oo lagu horumariyey jawaab celin uu bixiyey macallinka fasalka.

Waa maxay portfolio (Faylka dukumiintiga ardeyga)? Portfolio (Faylka dukumiintiga ardeyga) waa uruurinta shaqada ardayda iyo warqadaha himilada, oo lagu keeydiyo gal ama baqshad weyn. Shirka, arday waxay tixraaci karaan shaqooyin kaladuwan, oo loogu magac daray farshaxanada, kuwaas oo taageera macluumaadka ay wadaagaan.



# Xuquuqaha Ardeyda

Ardayda ayaa lahaan doonan xuquuqo wax ku ool ah oo aan lagu xadidi karin wanaag la'aan iyo sabab kufilan la'aan:

- Ardayda lagama xaqiri karo fursadaha waxbarasho ee loo siman yahay ama lauma takoori karo sawababa asal qaran ahaan, isir, diin, xaalad dhaqaale, jinsi, uur, xaalad guur, xiris hore, xabsi hore, ama curyaannimo jireed, maskaxeed ama mid dareen.
- Dhammaan ardayda waxay leeyihiin xuquuqaha dastuuriga ah ee xorriyadda hadalka iyo saxaafadda, in si nabad ah loogu kulmo meel eey howlaha dugsiga caadiga ahi ay ugu sii socon karaan sidii loo qorsheeyay, inay ka codsadaan dowladda iyo wakiiladooda, jimicsi diimeed oo lacag la'aan ah, iyo inay dugsiyadooda ka madax banaanaado xakamaynta ama saameynta kooxaha diineed, iyada oo ay saaran yihiin xadidaado macquul ah waqtiga, goobta iyo habka loo isticmaalo xuquuqahan.
- Dhammaan ardayda waxay leeyihiin xuquuqda dastuuriga ee ah inay ka aamin helaan baaritaannada iyo xoog ku qabsahada shakhsiyadooda, waraaqaha, iyo waxyabaha eey leeyihiin.
- Dhammaan ardayda waxay xaq u leeyihiin inay xor ka ahaadaan faragelin sharci darro ah inta ay dugsiga dhiganayaan.
- Ardayda iyo qoysaska ardeyda waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan adeegyo tarjumaad si ay si wanaagsan ugu fahmaan warbixinta dugsiga/degmada ee la xiriira macluumaadka tacliinta ee ardayda.
- Ardayda lagama xaqiri karo xaqa ay u leeyihiin fursad waxbarasho siman iyadoon la marin dacwada dhageeysiga sharciga.

## Codsiyada Macluumaadka Diiwaanada Ardayga ee Shaqa Bixiyaasha Milatariga

Sharciga dawladda dhexe wuxuu farayaa degmada dugsiga inay siiso kuwa qora mileteriga magacyada, cinwaanka, iyo nambarada taleefanka ardayda haddii waalidka ku wargalin degmada inaysan sidaas sameynin. Hadaadan rabin in degmada ay siidaayaan macluumaadka diiwanka ardeyga, ama aad rabto in macluumaadka xiriirka cunugaaga si gaar ah looga ilaaliyo kuwa qora millateriga, waa inaad ku ogeysiisaa dugsigaaga qoraal qoraal ahaan markay tahay Sebtember 30 sannad dugsiyeed kasta.

### ANSHAXA LABISKA

Ardayda waxay xaq u leeyihiin inay is muujiyaan iyagoo isticmaalaya dharka iyo lebbiska, waxayna leeyihiin waajibaadka ah inay ilaaliyaan oo ay horumariyaan goob waxbarasho. Degmadu waxay xaqiijineysaa xuquuqda ay ardayda u leeyihiin inay u dabaaldegaan haybtooda iyagoo isticmaalaya dharkooda, timahooda, iwm. Tani waxaa ka mid ah xorriyadda ay u leeyihiin muujinta aqoonsigooda jinsiyeed iyo dhaqankooda diimeed. Ardayda sidoo kale waxaa masuuliyad ka saaran inay ilaaliyaan oo ay horumariyaan goobta waxbarasho.

Kuwa soo socdaa waa in laga mamnuucaa dugsi kasta ama barnaamijka kale ee xeerka labiska ardayga:

A. Dharka muujinaya rajo macquul ah oo ah qalab iyo carqaladayn la taaban karo oo ku ah habka waxbarashada, waxyeelada hantida dugsiga, ama caafimaad ama badbaado khatar, ama wax kasta oo u ololeeya nacaybka;

B. Dharka muujinaya ereyo xunxun ama ereyo galmo, sawirro, farriimo ama waxyaabo aan caadi ahayn;

C. Dharka muujinaya maandooriyaha ama ereyada la xiriira alkolada, sawiro, farriimaha, ama aflagaadada;

D. Dharka jiifka, dacas, koofiyadaha dushooda ama shaati kasta oo gaaban oo muujinaya caloosha , surwaal si aan caadi ahayn ugu hooseeya oo miskaha hoos ugu xiran oo muujinaya dharka hoostiisa, ama gaaban ama goono ka gaaban dhererka faraha;

E. Dhar astaan u ah xubinnimada gaangiska ama muujiya ereyo, calaamado, fariimo, ama sawiro la xiriira gaangiska;

Xeerka lebbiska dugsiga waxa ku jiri kara shardiga ah in ardaydu xirto lebbiska yunifoomka iyo/ama calaamada aqoonsiga.

Shaqaalaha dugsiga ayaa u sheegi kara ardeyda inay beddelaan ama daddaan dharka wax u dhimaya jawiga waxbarasho; oo khatar khatar gelineysa ardeyga ama kuwa kale; oo ah karaahiyo, diinta ku xun, ama ceebeyn leh; ama ku dhiirrigelisa anshax darrada ama anshaxa aan dugsiga laga oggolayn. Ardayda waxaa looga baahan yahay inay u hoggaansamaan qawaaniin kasta oo dugsi u gaar ah oo la xiriirta dharka, oo ay ku jiraan shuruudaha dharka dugsiga. Xeerarka gaarka ah ee dugsiga waa inay ka ahaadaan dhexdhexaad jinsiyada qawaaniinta dharka dugsigana waa inay oggolaadaan xulashooyinka la awoodi karo. **Siyaasada 3224**

## Xuquuqaha Waalidka iyo Ardayda Marka la Sameenayo Xog Uruurin

Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Federal Way inta badan waxay u adeegsadaan waalidiinta, shaqaalaha iyo xog uruurinta ardeyda si ay u helaan jawaab-celin si loo go'aamiyo awooda iyo gobaha baahida ka jirto. Iyada oo ku saleysan natiijooyinka xog uruurinta, dugsiyadda ama degmada badanaa waxay awoodaan inay diiradda saaraan baahiyaha dugsiga ama degmada oo ay u qorsheeyaan sida ku habboon, iyaga oo fulinta barnaamijyada ama nidaamyada saameeya isbeddelada wanaagsan ee dugsiga ama degmada. **Siyaasada 3232**

Wixii ku saabsan Xuquuqaha Waalidka iyo Ardayda Marka la Sameenayo Xog Uruurin, fadlan ka tixraac isku-xireyaasha soo socota: https://www.fwps.org/fs/resource-manager/view/573d79a9-3de9-4110-b502-1289bc56d129.

## Macluumaadka Xiriirka Dugsiga

| | SCHOOL | ADDRESS | PHONE | WEBSITE |
|---|---|---|---|---|
| DUGSIGA XANNAANADA CARRUURTA | Adelaide | 1635 SW 304th St., Federal Way, WA 98023 | 253-945-2300 | adelaide.fwps.org |
| | Brigadoon | 3601 SW 336th St., Federal Way, WA 98023 | 253-945-2400 | brigadoon.fwps.org |
| | Camelot | 4041 S. 298th St., Auburn, WA 98001 | 253-945-2500 | camelot.fwps.org |
| | Enterprise | 35101 SW 5th Ave., Federal Way, WA 98023 | 253-945-2600 | enterprise.fwps.org |
| | Green Gables | 32607 47th Ave. SW, Federal Way, WA 98023 | 253-945-2700 | greengables.fwps.org |
| | Lake Dolloff | 4200 S. 308th St., Auburn, WA 98001 | 253-945-2800 | lakedolloff.fwps.org |
| | Lake Grove | 303 SW 308th St., Federal Way, WA 98023 | 253-945-2900 | lakegrove.fwps.org |
| | Lakeland | 35827 32nd Ave. S., Auburn, WA 98001 | 253-945-3000 | lakeland.fwps.org |
| | Mark Twain | 2450 S. Star Lake Rd., Federal Way, WA 98003 | 253-945-3100 | marktwain.fwps.org |
| | Meredith Hill | 5830 S. 300th St., Auburn, WA 98001 | 253-945-3200 | meredithhill.fwps.org |
| | Mirror Lake | 625 S. 314th St., Federal Way, WA 98003 | 253-945-3300 | mirrorlake.fwps.org |
| | Panther Lake | 34424 1st Ave. S., Federal Way, WA 98003 | 253-945-3600 | pantherlake.fwps.org |
| | Rainier View | 3015 S. 368th St., Federal Way, WA 98003 | 253-945-3700 | rainierview.fwps.org |
| | Sherwood Forest | 34600 12th Ave. SW, Federal Way, WA 98023 | 253-945-3800 | sherwoodforest.fwps.org |
| | Silver Lake | 1310 SW 325th Pl., Federal Way, WA 98023 | 253-945-3900 | silverlake.fwps.org |
| | Star Lake | 26812 40th Ave. S., Bldg B, Kent, WA 98032 | 253-945-4000 | starlake.fwps.org |
| | Sunnycrest | 24629 42nd Ave. S., Kent, WA 98032 | 253-945-4100 | sunnycrest.fwps.org |
| | Twin Lakes | 4400 SW 320th St., Federal Way, WA 98023 | 253-945-4200 | twinlakes.fwps.org |
| | Valhalla | 27847 42nd Ave. S., Auburn WA 98001 | 253-945-4300 | valhalla.fwps.org |
| | Wildwood | 2405 S. 300th St., Federal Way, WA 98003 | 253-945-4400 | wildwood.fwps.org |
| K–8 | Nautilus K–8 | 1000 S. 289th St., Federal Way, WA 98003 | 253-945-3400 | nautilus.fwps.org |
| | Olympic View K–8 | 2626 SW 327th St., Federal Way, WA 98023 | 253-945-3500 | olympicview.fwps.org |
| | Woodmont K–8 | 26454 16th Ave. S., Des Moines, WA 98198 | 253-945-4500 | woodmont.fwps.org |
| DHEXE | Evergreen | 26812 40th Ave. S., Bldg A, Kent WA, 98032 | 253-945-5100 | evergreen.fwps.org |
| | Illahee | 36001 1st Ave. S., Federal Way, WA 98003 | 253-945-4600 | illahee.fwps.org |
| | Kilo | 4400 S. 308th St., Auburn, WA 98001 | 253-945-4700 | kilo.fwps.org |
| | Lakota | 1415 SW 314th St., Federal Way, WA 98023 | 253-945-4800 | lakota.fwps.org |
| | Sacajawea | 1101 S. Dash Point Rd., Federal Way, WA 98003 | 253-945-4900 | sacajawea.fwps.org |
| | Sequoyah | 3425 S. 360th St., Auburn, WA 98001 | 253-945-3670 | sequoyah.fwps.org |
| SARE | Decatur | 2800 SW 320th St., Federal Way, WA 98023 | 253-945-5200 | dhs.fwps.org |
| | Federal Way | 30611 16th Ave. S., Federal Way, WA 98003 | 253-945-5400 | fwhs.fwps.org |
| | Thomas Jefferson | 4248 S. 288th St., Auburn, WA 98001 | 253-945-5600 | tjhs.fwps.org |
| | Todd Beamer | 35999 16th Ave. S., Federal Way, WA 98003 | 253-945-2570 | tbhs.fwps.org |
| QADADKA KALE | Federal Way Open Doors | 31455 28th Ave. S., Federal Way, WA 98003 | 253-945-4590 | opendoors.fwps.org |
| | Federal Way Public Academy | 34620 9th Ave. S., Federal Way, WA 98003 | 253-945-3270 | fwpa.fwps.org |
| | Internet Academy | 31455 28th Ave. S., Federal Way, WA 98003 | 253-245-2230 | iacademy.fwps.org |
| | TAF@Saghalie 6–12 | 33914 19th Ave. SW, Federal Way, WA 98023 | 253-945-5000 | tafatsaghalie.fwps.org |
| | Truman Campus | 31455 28th Ave. S., Federal Way, WA 98003 | 253-945-5800 | careeracademy.fwps.org |

# Gaadiid Qaadashada

Dugsiyadda Dadweynaha Federal Way waxay leeyihiin waajibaad ah inay gaadiid siiyaan dhamaan ardayda oo waafqasan shuruudaha sharciga. Ardeyda oo imaada boosteejada baska waqtiga loogu talagalay oo soo bandhiga dabeecado amaan ah waa mas'uuliyad la wadaago oo ka dhaxeysa degmada iyo qoysaska si loo hubiyo in ardayda ay dugsiga yimaadaan iyagoo nabad ah oo diyaar u ah inay wax bartaan. Darawalka baska wuxuu abuuri doonaa isfaham la wadaago oo ku saabsan amniga baska iyo anshaxa.

Nuqul ka mid ah habdhaqanka laga filayo ayaa la siin doonaa ardeyda bilowga sanad dugsiyeed kasta, iyo diiwaangelin kasta oo ardayda cusub ah, si loo xaqiijiyo in ardeyda ay ogyihiin dhaqanka la aqbali karo ee baska dugsiga. Sharciyadan waxaa dib u eega ardayga iyo waalidka ama mas'uulka(liyiinta). Dhaqan kasta oo baska ay maamusho Dugsiyada Dadweynaha Federal Way korkiisa ee carqaladeyn kara howlaha amaan ee caadiga ah ee baska waxaa loo arki doonaa anshax xumo. Ardayda, shaqaalaha, iyo qoysaska dhamaantood waxaa ka go'an hubinta dhaqanka badbaadada, ixtiraamka, iyo masuuliyada lawada wadaago. **Siyaasada Habraaca 6607 iyo Habraaca 6607P**

### ARDAYGA XAALADA GURI LA'AANTA HEYSATA

Degmadu waxay u fidisaa gaadiid ardayda xaalada hooy la'aanta ku jira oo ay kamid tahay si ku-meel-gaar ah inay ula joogaan asxaabta iyo/ama xubnaha qoyska. Ardayda way waayi karaan gaadiidka gaariga hadii ganaaxyada baska la soo rogo iyo/ama hadii ardeyga uusan ogeeysiinin gaadiidka goorta aysan adeegsan doonin gaadiidka maalinkay noqotaba. **Siyaasada 3115 iyo Habraaca 3115P**

*Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ardayga xaalada guri la'aanta heysata (McKinney-Vento), fadlan kala xiriir Xafiiska Sinnaanta ee Ardayda iyo Guusha Qoyska lambarka 253-945-2000.*



**Ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska dhamaantood waxaa ka go'an hubinta dhaqanka badbaadada, ixtiraamka, iyo masuuliyada lawada wadaago.**

### ANSHAXA BASKA

| Filashada | Wadida Baska | Fuulida/Ka-degida Baska |
|---|---|---|
| **Nabad Qab Lahoow** | • Fadhi meeshaada horayna fiiri.<br>• Hakugu ekaadaan gacmahaaga, cagahaada, iyo shey'yadaada.<br>• Wargeli darawalka dhaqanka amni darada ah.<br>• Banee marinada. | • Gudub dariiqa keliye marka darawalka uu ku baaqo inay amaan tahay.<br>• Ka dhaqaaq baska agtiisa markaad deggato.<br>• Sii kuwa kale wado.<br>• Ka fogow baska ilaa albaabka uu ka furmayo. |
| **Xushmad lahoow** | • Raac tilmaamaha darawalka.<br>• Xushmee hantida dadka kale.<br>• Isticmaal luuqad iyo ficilo naxariis leh. | • Sug tookadaada.<br>• Fadhiiso dhaqso.<br>• Ka soo rara baska gadaal ilaa afka hore.<br>• Salaam kuwa kale iyo ka jawaab salaamaha. |
| **Masuul Ahaaw** | • Baska nadhiif ka dhig.<br>• Codadka yareeya.<br>• Gasho cunnada/cabitaanka boorsada dhabarka iyo alaabtaada.<br>• Fadhiiso: ugu badnaan labo qof halki kursi. | • Waqtiga loogu talagalay imoow boosteejada baska.<br>• Ka warqab agagaarka.<br>• Baska fuul oo kagadeg boosteejadaada. |

*Ahmiyadeenna koowaad ayaa ah inaan ka dhigno arday walba mid badbaado leh xilli walba. Waxaa naga go'an inaan taageerno darawalladeena da' yarta ah oo aan rumeeyno in ardayda oo dhami ay gaari doonaan go'aan gaari wadid iyo gaari dhigis mas'uuliyad ku dheehan tahay waqti walba.*

## Gaariyada yaala Dhismaha Dugsiga

Gaari ku barkimida qaybaha baarkinadda dugsiga iyo/ama dhismaha degmada waxay qatar ku tahay milkiilaha/darawalka laftiisa oo kamid tahay inta lagu gudajiro cimilada daran. Degmada dugsiga ma qaadato mas'uuliyadda waxyeelada ama luminta gawaarida hantida sida gaarka ah loo leeyahay ama dhismaha baabuurta yaalaan oo ay geystaan ardeyda kale, booqdeyaasha, shaqaalaha, iyo/ama cimilada xun, ama sababaha kale dabiiciga ee la xiriira masiibo.

- Dugsi kasta wuxuu hirgalin doonaa khidmadaha baarkinka wuxuuna nidaamin doonaa baarkin dhigashada hantida dugsiga.
- Dugsiga wuxuu sanad walba ogeysiin doonaa ardayda iyo waalidiinta khidmadahan, qawaaniintan iyo sharciyadan. Wixii khidmad ah ee la xiriira baarkinka waxaa loogu talagalay dayactirka iyo dib u habeynta, ma ahan in la dammaanad qaado amniga dadka, gawaarida ama waxyaabaha gaariga ku jira.
- Awoodda hay'adaha sharci fulinta ee lagu ilaaliyo amarrada gawaarida ayaa soo gaari doonta hantida degmada dugsiga.
- Gawaarida sida sharci darrada ah loo bakimo waxaa lagu jiidi doonaa kharashka milkiilaha.
- Marka loo eego xeerarka anshaxa ardayga iyo ficillada edbinta ee suurtagalka ah, "haysashada" cabbitaannada khamrada leh, walxaha kiimikada sharci-darrada ah ama kaniiniyada maandooriyaha, qoryaha, ama hubka khatarta ah, ama waxyaabaha kale ee la mamnuuco ayaa sidoo kale gaari doona gaariga ardayga.

Ku dhex isticmaalka gawaarida matoorka ku shaqeeya hantida dugsiga ee ardeyda, booqdayaasha, iyo shaqaalaha dugsiga waxaa loo maamuli doonaa danaha amaanka. Ardayga aan u hoggaansamin qawaaniinta kor ku xusan waxaa laga qaadi doonaa tallaabo edbin ah. **Siyaasada 3243**



## Lifaaqa

*Heshiiska/Nidaamka buluugga ah ee lagu xusay buug gacmeedka*

Si aad u hesho luqadda buuxda ee siyaasadeena iyo habraacyadayada, fadlan tag: **www.fwps.org/about-us/administrative-policies-procedures**

| MAGACA SIYAASADA | LAMBARKA SIYAASADA |
|---|---|
| Nidaamka Macluumaadka Elektiroonigga ah (Shabakado)/Heshiiska Adeegsiga Ardayga | 2022, 2022P, 2022.2P, 2022.2P SPL, 2022.2P KOR, 2022.2P RUS |
| Ka Hortagga Ismiidaaminta/Isdal-dalaada | 2145 |
| Hawlaha Ka Dhaxeeya Dugsiyada | 2151, 2151P |
| Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada La Xiriira | 2161, 2161P |
| Waxbarashada Ardayda Naafada ah ee hoos timaada Qeybta 504 | 2162, 2162P |
| Da'da, Shuruudaha, iyo Meelaynta | 3110, 3110P |
| Ardayda Niska Wax Barata | 3114 |
| Ardayda Hoylaawayaasha ah: Xuquuqda iyo Adeegyada Isdiiwaangelinta | 3115, 3115P |
| Ardayda ku jirta Xanaanada Hooyada | 3116, 3116P, 3116F |
| Diiwaanada iyo Isdiiwaangelinta iyo Soo Xaadirida | 3120, 3120P, Addendum: Student History |
| Shuruudaha Soo Xaadirida Ardayga iyo Waxyaabaha Laga Filayo | 3121, 3121P |
| Maqnaanshaha Cudurdaarka Leh iyo Kan Aaan Cudurdaarka Lahayn | 3122, 3122P |
| Ka bixida Dugsiga Kahor Qalin-jabinta | 3123 |
| Saarida/Siideynta Ardayda Inta Lagu Gudajiro Saacadaha Dugsiga | 3124, 3124P |
| Haynta Ilmaha | 3126 |
| Aagagga Imaanshaha Degmada | 3130 |
| Diiwaangelinta Xulashada | 3131, 3131P |
| Siideynta Ardayda Deegganka | 3140, 3140P, Form 211-ChoiceRequestTransfer |
| Arday Isdhaafsiga Caalamiga ah | 3142, 3142P |
| Ogeysiiska Degmada ee Dhalinta Dembiilayaasha ah | 3143 |
| Siidaynta Macluumaadka Ku Saabsan Dambiilayaasha Galmada Ee Ardayda | 3144, 3144P |
| Xuquuqaha iyo Masuuliyadaha Ardayda | 3200 |
| Ilbaxnimo | 3203 |
| Xadgudubka Galmo ee Ardayda Waa La Mamnuucay | 3205, 3205P |
| Mamnuucida Dhibaataynta, Hanjabaada iyo Xoogsheegashada | 3207, 3207P, 3207 (F1), 3207 (F1) RUS, 3207 (F1) KOR, 3207 (F1) SPL, 3207 (F1) UKR, 3207 (F2), 3207 (F3) |
| Ogeysiiska Hanjabaadaha Rabshadaha iyo Dhibaateynta | 3208, 3208P |
| Takoor La'aan | 3210, 3210P |
| Ardayda Jinsiga Bedeshay iyo Ardeyda Doorka Jinsigooda aan Lahayn | 3211, 3211P |
| Xoriyadda Qowlka | 3220, 3220P |
| Qaybinta Alaabaha | 3222, 3222P |
| Xoriyadda Kulanka | 3223 |
| Lebiska Ardayga | 3224, 3224P |
| Hawsha ama Ururka Burcada | 3225, 3225P |

*Heshiiska/Nidaamka buluugga ah ee lagu xusay buug gacmeedka*

Si aad u hesho luqadda buuxda ee siyaasadeena iyo habraacyadayada, fadlan tag: **www.fwps.org/about-us/administrative-policies-procedures**

| MAGACA SIYAASADA | LAMBARKA SIYAASADA |
|---|---|
| Asturnaanta Ardayda iyo Baadhitaannada | 3230, 3230P |
| Diiwaanada Ardeyda | 3231, 3231P |
| Xuquuqda Waalidka iyo Ardayda ee Qaadista Xog Uruurinta | 3232 |
| Anshaxa Ardayga | 3240 |
| Asluubta iyo Tallaabada Edbinta ee Anshax Xumada Ardeyga | 3241, 3241P |
| Xero Dugsi Xiran | 3242 |
| Gaariyada yaala Dhismaha Dugsiga | 3243 |
| Mamnuucida Ciqaabta Jirka | 3244 |
| Adeegsiga Aaladaha Isgaarsiinta/Qalabyada Elektiroonigga ah | 3245 |
| Tubaakada, Qamriga, Maandooriyaha iyo Waxyaabaha Maanka Dooriya | 3248, 3248P |
| Badbaadada iyo Fayo-qabka Ardayga | 3400 |
| Caafimaadka Ardayga | 3410 |
| Baaritaanka Aragga iyo Maqalka | 3411 |
| Automated External Defibrillators (AEDs) (Mashiinta Lagu Saxo Wadna Garaac iyo Neef-joogsiga) | 3412, 3412P |
| Talaalka Ardayda iyo Xaaladaha Khatarta Ku ah Nolosha | 3413, 3413P |
| Xakameynta Cudurada Faafa | 3414 |
| Qaadsahada Ardayda Sonkoroowga Qaba | 3415, 3415P |
| Daawo Ku Qaadashada Dugsiga | 3416, 3416P |
| Tuuba U Gelinta | 3417 |
| Daweyn Degdegga ah | 3418, 3418P |
| Isa Siinta Daawada Neefta iyo Xasaasiyada Daran | 3419, 3419P |
| Ka Hortagga Xasaasiyada Daran | 3420, 3420P |
| Ku Xadgudubka, Dayaca iyo Ka Faa'iideeysashada Carruurta | 3421, 3421P |
| Ciyaaraha Ardayda – Jugta Madaxa iyo Dhaawacyada Madaxa | 3422, 3422P |
| Lacagaha Ardayda, Ganaaxyada, iyo Khidmadaha | 3550, 3550P |
| Xeerka Hubka Khatarta ah ee Dhismooyinka Dusiga | 4210 |
| Isticmaalka Tubaakada ee Hantida Dugsiga Dhexdiisa | 4215 |
| Anshaxa Ardayga ee Basaska | 6607, 6607P |

**Weey ku mahadsan**

yihiin gudiga degmada ee Xuquuqaha iyo Masuuliyadaha fikirkooda iyo ardayda iyo qoysaska bixiyay jawaab celinta.

**FEDERAL WAY**
PUBLIC SCHOOLS

Macluumaadka ku jira buug gacmeedkan ayaa ahaa mid cusub waqtigi la daabacay. Shuruucda federaaliga, gobolka iyo degmada waxay saameyn ku yeelan karaan cusbooneysiinta siyaasadaha iyo nidaamyada degmada, oo nooca ugu dambeeyay ee buugga-gacmeedkan waxaa laga heli karaa bogga inatrnetka ee www.fwps.org. Dhamaan siyaasada iyo habraacyada waxaa laga heli karaa dugsiyadda Dadweynaha ee Federal Way **www.fwps.org/about-us/administrative-policies-procedures**

SOMALI